KABALYEERI

(Qiso)

Copyrigh © 2019 by Aysar yussuf

Wixii talo ama ka dheeraad ah, iigu soo dir jiimeylka hoos ku xusan.

aysarstory@gmail.com
Mogadishu-Somalia

XUQUUQDA DAABACAADDA

Xuquuqda buuggani waxa leh qoraaga, Lama daabici karo lama sii badin karo Iyada oo aan wax fasaxa laga heysan qoraaga buuggan.

Aysar Yusuf

Hordhac

“kaliya bilow akhrinta qisadan, dhameynteedu aniga kuu balan qaadaye e.”

Qisadani waa mid tibaaxeysa dhinacyada kala duwan ee noloshada. Sida dhinacyada jaceylka, hormarka iyo dalxiiskaba. Sheekadu waxa ay quseysaa wiil dhalinyaro ah, oo waxbarashadii isaga tagay, soona maray marxaladaha kuwii ugu adkaa ee nolosha. Laakiin si walbey daruufuhu u dhiig miiranayeen, imika waa hantiile, o ay hantidiisu kor u dhaafeyso labo malyuun oo doollar. Waxa uu imika ganacsigiisu isku xeranyahay Abu dabey ilaa Neyroobi.

Qisadu waa mid si dhaba u dhacday, laakiin loo xardhay hab sheeko faneed. Maadaama ay qisadu tahay mid si dhaba u dhacday, waxa qasab noqotay in magacyada loo rogo jilaayasha sheekada ku jiro, taaso ah codsi ka yimid qofka ay qisada ku dhacday.

inta aad ku guda jirto aqrinta qisadan, waxaad isku mari doontaa ilaa todobo magaalo, oo ku kala yaallo afar dal.

Qoraaga iyo Axmed

Waxaan sugayay koob kafey ah si uu maalinteyda uga dhigo mid fir fircoon. Dad yar ayaa fadhiya baarka, jawiguna aad buu u daggan yahay, markii laga reebo sawaxaanka soo badanayo oo ah dhallinyaro badan oo isku diyaar gareyneysa in ay xeebta kubbad ku cayaaran.

Kabalyeerigii ayaa ii keenay cabitaan cambo aad u rasiin ah, waan yaabay, nin bidixdeyda fadhiyana wuxuu u keenay kobashiin. Mar qura ayaanu wada eegnay kabalyeerigii aniga iyo ninkiiba, kabalyeerigii ayaa inta shakiyay ayuu nagu yiri “maxaa qaldan mudanayaal?.” Ninkii ayaa yiri “aniga cabitaan ayaan dalbaday” anigana waxaan iri “anna koboshinka ayaan dalbaday”, markaan aragnay inuu dalabku is dhaafsanyahay ayaan is weydaarsanay si ay dhoolacadeyni ku dheehantahay. Waa howleheygiiiye halkii baan kaftan ka billaabay markii aanu cabbaar kaftannay ayaan ku dhahay “magaceygu waa Aysar” isaguna waxaa uu magaciisu iigu sheegay Axmed.

Maalinta jimco bey ahayd aadna uma aan sii sheekeysan oo waxaan usoo deg degayey salaadda jimcaha, waana macsalaameyay Axmed, waxaana

horay uso qaatay rasiidyadii lacag bixinta ee koboshinka iyo cabitaanka, si aan lacagta usii bixiyo, Axmedna wuu iga soo daba qeylinayey, isagoo ileh “walaal aysar, maxaad isku dhibeysa anigaa bixin lahaaye”, aniga dheg uma sii dhigin hadalkiisa oo aniga oo yara qoslaya ayaan suul u taagay oo aan ula jeeday mahadsanid.

Todobaadkii xigay

Waxay ahayd subax qamiis ah, waxaan kasoo baxay gurigeyga, waxaan soo aaday xeebta, muddo daqiiqado kaddib ayaan imid xeebta, waa aroor hore, jawiga badduna waa uu yara kacsanaa, waxaan fariistay darbi aysan biyuhu isoo gaareyn.

Sida caadada ii ahayd ba waxaan billaabay fikirkeygii iyo inaan eego halka aad mooddo in badda iyo cirku ey isaga darsamaan iyo inaan riyooyinkeygii dhex dabaasho. Qorraxdii ayaa soo yara ku lulaatay waxaan imid kofey baarkii aan fariisan jiray. Kolkii aan soo fariistay ayaan billaabay inaan hareeraha eeg eego, waxaa si kadis ah ku arkay Axmed oo fadhiya meel aan sida iiga fogeyn, layaabbey igu noqotay inaan markale dib u arko.

Buuggeyga xasuus qorka aha, ayaan warqad yar ka jaray o an ugu qoray “Axmedow, soo maanta adiga ma bixineysid kobashiinka?” waxaana ugu dhiibay kabalyeeriga oo an ku dhahay “yarkaas dheer ee timaha badan o fanaanada madowga xiran, warqaddan igu geey.” Axmed markii uu warqadda aqriyay ayuu durbadiiba fahmay cidda uso qortay, isaga oo dhoola cadeynaya ayuu dhankeyga soo eegay, markasuu miiskeyga igu yimid, isagoo

salaan diiran isalaamay, waanu wada sheekeysanay, Axmed waanu is fahannay, waxaana u sheekeysanay sidii dad aad mooddo iney muddo badan saaxiibbo soo ahaayeen.

Axmed waa qof aad u dabci wanaagsan, wuxuu iweydiiyay su'aalo dhowr ah, waxaana ka mid ahaa "saaxiib, maxaad u jeceshahay inaad marwallba kaliga ahaato?." Waxaan ku dhahay "saaxiib, waxaan jeclahay inaan kali ahaado si aan jaanis ugu helo inaan ka fekero riyooyinkeyga. Axmed waxaa uU iga codsaday buug yareheygii oo xasuus qorka ii ahaa inuu aqriyo, laakiin waxaan ka yara baqayey inuu layaabo riyooyinkeyga xadka baxa ah, laakiin kolkii uu kale furay Axmed wuxuu indhaha la raacayey ereyadii aan ku misaalaynayey riyoonyinkeygii, si ay aamusnaani ku dheehantahay, isago aad mooddo inuu jecleysanayo aqrintooda waliba isagoo madaxa lulaya.

Waxa uuna igu yiri "saaxiib, waa ereyo, xamaasad badan qofkastoo aqriyana ay dareen iyo himmad galineyso." Waxaan ku dhahay "mahadsanid, saaxiib."

Waxaan weydiiyey "saaxiib, waa maxay qisadaada?." Axmed waa uu igu qoslay wuxuuna igu yiri "saaxiib, qisadeyda qalimaan aad ku qorto ma u heysataa?",

waxaan ku dhahay “saaxiib, dheesha maad naga dhaaftid.” Wuxuu igu yiri “Saaxiib waa iga dhab, kaftan igama aha.”

Waan rumeysan kari waayey oo kaftan uun bu ilaa muuqday hadalkiisa, laakiin ma aheyn midaan ka filanayey inuu xambaarsan yahay qisada sidan u weyn. Mar qura ayaa kabalyeerigii inoo keenayey koboshiinka ayaa dhinac u jaleecsaday, markaa ayuu Axmed dharka ka gaarsiiyay kafeygii. Markaa ayaan is heyn waayey oo kabalyeerigii aan ku qeyliyay, Ahmed baa iqabtay oo igu yiri “waa caadi saaxiib, wax micna ah ma laha.” Marka ban si lama filaan ah Axmed afkiisa uga maqlay “anigaba wan so ahaa kabalyeeri.” Aniga layaab bey igu noqotay, sababto ah furo gaari iyo telefon iPHONE ah ayuu watay. Waxaan ku dhahay

“saaxiib Axmed miyaad igu ciyaareysa?”, markasuu igu yiri “maya, saaxiib ee soo horri kuuguma dhihin, qalimaan aad qisadeyda ku qorto ma heysataa” waxaan ku dhahay “waa ballan inaan qisadaada qoro.”

Ahmed kalmadihiisi ayaa fekero kale duwan igu dhaliyay, markaa kaddib aniga iyo Axmed waxaan ku wada ballanay inaan galab waliba o qamiis iyo jimcaha ah inaan wada qorno qisadiisa. Xilli ay

duhur ku dhaweyd ayaan kasoo baxnay huteelkii aan wada fadhinnay, waxaan soo wada raacnay gaarigiisa oo ahaa mid casri ah <last model>. Wuxu iso dhaweeyay gurigeyga, halkaa ayaan isku macsalaameynay.

Bilowga Qisada

“Qisooyinku kala muunad iyo magac weyn, tani waa qiso xambaarsan jacayl, niyad jab, hormar, iyo dhiirigalin intaba. Akhriste waa in ay markastaaba boorsoyinkaagu kuu xirxirnaadan oo waxaanu gali doonna safaro kale duwan oo magalaayin iyo wadamo kale duwan intaba.”

Waxay ahayd 15-kii Ogoosto. maalin jimco ah, waanu wada faraxsaneyn aniga iyo saaxiibadey, Waxaa inoo soo dhamaaday imtixaanka feynaalka e sannadka kowaad ee jaamacadda.

Waxaanu isku af garannay galabta oo jimco ah inaan u damaashaad tagno huteel kamida kuwa ugu caansan huteelada, si aan jawi qurux badan ugu soo wada qaadanno aniga iyo saaxiibadeyda.

Waxaan ku jiray riyo macaan, waxaan kaso dhacay sariirta, aahh, waxaan dib ugu laabtay sariirta si aan hurdadeyda iyo riyadeydaba usii wato, laakiin riyadani ma aha mid aan mar quraata ku riyooday, e waa riyo aan in badan ku riyoday, sida: huteelo, elebooro iyo aniga oo dhex jooga magaalo weyn oo leh dabaqyo fooqyo dhadheer iyo waddooyin waa-weyn, iyo wax yaabo kaloo badan oo aan sawiran karrin marka aan hurdada ka tooso.

Laakiin markale waxaa hurdada iga toosiyey telefonkeyga oo so dhacaya, waxaan eegay lambarka isoo wacaya, waa saaxiibkey, waan ka qabtay wuxu igu yiri “saaxiib, banaanka ayaanu kuu taagannahay ee ma is diyaarisay?”, wan naxay waxaan eegay saacada waa waqtigii ballanta waxaan ku dhahay “maya, iga raalli noqo saaxiib hadda ayaan is diyaargareyna e ii dulqaata wax yar.”

Deg deg ayaan isku soo diyaariyay, waxaan xabadka isgalinnay saaxiibadey. (Maahir, Maxamed iyo feysal waa seddexda saaxiib aan dunida ugu jeclahay waa dadka aan nolosha iska fahannay waxaanu nahay saaxiibo dhiigga isku huro ee aan is xasdin waxaanu nahay saaxiibo isku faraxsan, hadduu mid naga xanuunsado inteenna kale hurdaba nooma dhadhami jirin).

Marka kaddib waanu is soo wada raacnay, socod dheer kaddib waxaanu nimid huteelka qeybtiisa kafateriyaha, bilicdu meesha aad bey u qurux badneyd indhaha dadkuna aadbey usoo jiidaneysay, waxaa fadhiyo dad badan sida qoysas is wato, dhallin badan oo inamo iyo hablaba leh iyo waxaa kalo fadhiya dadkale o aad dareymeyso iney dhaqammo shisheeye xambaarsanyihiin.

Waxaanu si dirqi ah ku helnay miis banaan, waanu fariisannay aniga iyo saaxiibeyda, anigu waxaan ku mashquulsanaa eeg-eegista bilicda meesha iyo sida ay dadku ugu raaxeysanayaan jawigan macaan.

Waxaa noo yimid kabalyeerigii wuxu ino keenay buug yar ey ku sawiran yihiin dalabaadka baarka yaalo iyo qiimohooda, kabalyeerigii halkii uu ina sugayey inaan wax dalbado, waxaan aad ugu mashquulnay, sawir farshaxaneydyada quruxda badan ee cuntooyinka iyo koboshiinaadka ku sawiran ilaa waa wax nagu cusube. Kolkii danbe ayaan waxaanu dalbanay cabitaanado kale duwan.Waxaanu ahayn kuwa sheekeysanaya oo aad u faraxsan, wada qoslaya. Laakiin anigu waxaan ahaa mid ku mashquulsan bilicda meesha, ubaxyada ku abuuran iyo dadka mesha ku sugan sidey u wada faraxsanyihiin, laakiin maalinta ayeey

nolosheyda si dhab ah u billaabatay, mar qurata ayaa dareenkeygii isbadallay. Indheheygii wey aamini waayeen waxaa u muuqda iney dhab ahaayen iyo inkale, dhaldhalaalka dhabannadeeda waxaadba moodda in dheyman lagu xardhay, wexey leedahay indho waaweyn iyo sunniyo quruxdoda aad mooddo in hab loo qoray, waxaanba is iri ma xurulceyntii jannada laga jeexay.

Waxaan dareemay lahaansho waan awoodi kari waayey inaan indhaheyga xakameyo eegistey eegayan, iyaduna wexey eheed qof farxad badan asxaabteedana aad ula qoslaysa, waxaa is qabtay indheheyga iyo indheheeda, waan yara naxay wan ka jeestay oo indhaha ayaan hoos geeyey, sidii cunug edeb darro sameynaya oo ay hooyadii aragtay oo kale, markale ayaan isku dayay inaan eego laakiin iyadu wey i dareentay inaan ku maqanahay eegista muuqeda, wajiga ayeey ii yara kaduuday, intan laha u dholacadey ayaa igaaray cabitaankii aan cabayey marka bey igu qososhay xitaa saaxiibadeyda waa ay igu qosleyn oo waxaa ay igu dheheen “iska daa qof buu ku maqnaaye”, marka ban u yara waji kaduuday, markey halka mari ayaa waxaan billaabay inaan indhaha kala kaftamo sida inaan mar u il jabiyay ee ayaduna is xanajisay oo farkeetadii ay jibsiga ku cuneysay xoog gacanta

ugu qabatay.

Markaa kaddib saaxiibadey ayaa igu yiraahdeen “saaxiib maanta adiga dhan jawi kale ayaad ku jirta maxa ku helay waa adigan maahsane?” waxaan ku qanciyay inaan caadi ahay, waxaan is iri “haddaad si fadhidaan asxaabtaadu waa ay ogaanayan, kaddibna adiga lagugu ruwaayadeysan doona” kaddib ayaan so wada baxnay maadaama uu ina sugayo socod dheer ee aan cawada magaalada kuso wada tamashleyn leheen.

Waxaan ka codsaday iney wax yar isugaan, suulida (musqusha) ayaan galay kaddib ayaan tiish waxaan ugu qoray “dhab ahaanti indhaagu wey qurux badanyihiin” farriinti ayaan suray laba alwaax dhexdooda markii ay dhankeyga soo eegtay, marka kaddib ayaan wada baxnay aniga iyo saaxiibeydada waxaan niyadda ku hayey ama uu qalbigeyga ii sheegayey qoftaan sidan u quruxda badan ineysan isku shuqlineen farriinta yar ee aan u dhaafay.

Nolosha habeenkii ama habeen socodku waa uu ka xamaasad iyo qurux badan yahay maalin socoshada magaalada, sida ay magaaladu u shidantahay, isu socodka dadka iyo ganacsiga sida suuqyada waaweyn, super market yada, carwooyinka iyo tagaasida iyo sida ay saxmadda u

yihiin baararka shaaha, waxaad dareemeysa in xasiloonidii, nabadii iyo horumarki dalka inu dib usoo laabanayo,

Waxaan istaagnay meel feel lagu jiray jalaatada <ice creamka> wan yar daallanaa qof ayaa si lama filaana iskey soo hortaagay waaba gabadhi, wexey igu tiri “Hi” oo la micno ah “salaan haye camal ah”, wey isii dhaaftay waxeyna gashay gaari meesha u taagna wuuna sii dhaqaaqay gaarigii. Daalba aduu ku hayey, jawi kale ayeey igalisay sida kartida leh ee ay ugu dhiiratay iney isoo hor istaagto.

socod dheer kaddib waxaan si nabad leh ugu soo laabannay guryeheennii aniga iyo saaxiibadey.

Baashaalkii, jimcaha kaddib waxaan ahaa mid aad mooddo iney noloshiisa farxad kuso siyaaday, gabadhii aan arkayay jimcihii ayaad moodda iney noqotay furo kamida furayasha farxdeyda, mana aqaanno inaan dib ula kulmi doono.

Dhab ahantii waxaan dareen u qaaday, gabar aan aqoon u laheyn xitaa magaceeda, lambarkeeda amaba wax kusaabsan dhankeeda. xilli kasto aan kali noqdo waxaan ahaa mid iyada uun ka fikira sababto ah, habeenkey iskey soo hartageysay, haddey isbiirsanlahayen dhalaalka dhabankeed iyo

dhoolacadeynteda waliba si ay kalgacal ku jirto waxaan ku misaali lahaa iney nalalka oo idil habeenka ay lumin lahaayen iftiinkooda oo sidii xiddigii ay iyaduna dhalalkeedu ina wada deeqsiin laheyd sidii caddo shan iyo tobonaad ah.

Damashaadkennii xigay

Qadka ayaan furay, waxaa isoo dhacay farriimaha whatsappka ee UB group o loso gaabiyo (united brothers group), waxaa wada sheekeysanayey Maahir iyo Qaalid, waxaan u qoray salaan, Qaalid ayaa iga qaaday, Maahir ayaa igu yiri “Feysalna meeye Axmedow”, waxaan ku dhahay “hadda dhow buu iga tagay malaha wali guriga ma uusan gaarrin.”

Marka baa Qaalid igu yiri “bari waa jimce xaggeenu qabanna?.” Dood wadaag dheer kaddib waxaan ku guuleystay inaan ka dhaadhiciyay inaan bashaalka jimcaha kuso wada qaaddano meeshii aan jimcihii hore aadeynay, waxaan qaalid ku dhahay maahirna u sheeg hadalkisa uma jeede waa u seexdan u maleynaya, qaalid ayaa igu yiri waqtigiisa ayaa la gaarey, ciyow seexashada waa lagu yaqaannaa oo dadka caafimaadka badan ciyow ayeey seexdaan. Maahir wad naga caafimaad badantahay ayaanu dhahnaa, sababto ah haddii aan isku dhahno waa cayilantahay waa uu nala dagaala, mana u adkeysan karno qanjaruufadisa xanuunka badan.

waxaan ku rajo weynaa inaan qoftii halka dib isugu arki doono. markii aan baarkii nimid ayaan hareera eeg-eegay, laakiin meysan joogin goobta, waan yara niyad jabay, haddana waxaan sii arkay warqaddii

aan farriinta ugu qoray oo halkeegii suran. Waxaan soo abbaaray halkii ay warqadda surneyd, markii aan kala furay warqaddii misana jawaab ayaaba gadaal kaga qoran, farxad ba qalbigeyga buux dhaafisay, meelan isgeeyo ayaaban garan waayey, aniga oon aqrin jawaabta. Kaddib ayaan billaabay aqrinta warqadda, wexey iguso jawaabtay “mahadsanid, laakiin maxaa kaa galay haddey indheheygu qurux badan yihiin.” Wexey doonto haiiguso jawaabto e, waxaa ii farxad ahaa iney warqaddeyda ku qabato gacmeheeda quruxda badan, ayna ku aqriso indheheeda aad mooddo kuwii xurulceynta.

Marka kaddib ayaan so dhexgalay saaxiibadeyda, marka ba feysal igu yiri “saaxiib, waadba naga soo habsante ma qof bad soo arkatay”, si kaftan ayan ku dhahay “Haa, laakiin kisto adigey ku qaab ekeed”, marka baa kaftankeenii iyo wada sheekeysigeenii iska sii wadanay. Waxaan si kadis u maqlay qof dhahaya “kabalyeeri markasto waxaad iska jeceshahay inaad dalabka inagaso daahiso”, markaan eegay waaba iyadiiba, waxaadba moodda hadalkedu inuu sidii magnadkii isoo jiidanayo,

Kuma fikireyn inaan dib u arki doono laakiin niyad qaboobi ban yar dareemay, aragtideeduna

farxadbey ii eheed. iyadu imeysan arkayn, laakiin indheheygu muuqeeda ayeey ku raaxeysanayn. Maanta wey ka sii qurux badantahay sidii hore, waxaadba moodda in iyada ay shirkadda dharka si gooni ah ugu soo sameysay.

wexey xirantahay isku joog kalarka pinkiga ah (midabka basala iiga ah), laakiin qalin suniga u marsana ayaa ka yara gaarsana tarxada ay xiraneyd, gabdhaha la fadhiya oo dhan cabitan bey wada cabayan laakiin iyadu kafey ayaa horyaala, ma garan karo sababta kala duwanashaha, inkastoo aan dooqa kaboshin jacaylka ku kale duwannahy.

Mar qura ayaa telefonka maahir oo saarnaa miiska ayaa kuso dhacay cod dheer, oo ahayd hees marka magaalada laga wada xiiseynayey. Waxaanu usoo wada deg-degnay telefonka aniga iyo maahir si aan codka uga jarno, aniga danteydu waxa ay eheed ineysan na arag gabadhatan, laakiin nasiib xumo markaan eeg is idhi waxaan arkay iyado yara dhoolaceyneysa, markasey igala hadashay faraha iyado kala jeeda “inoogu celi markale heesta”, markasaan wajiga uyar kaduuday, markale ayey igu qososhay, kaddib waxaan isku dayey inaan asxaabteyda waqti la qaato.

Markaan bixi rabnay ayaan warqad ugu qoray

“indhahaga quruxdooda aadban ula dhacsanahay, laakiin wareeya tahay (wareey waa qofka sheekada badan)”, kaddib ayaan u suray halkii aan u suri jiray farriinta.

Aniga kama dhalan qoys maalqabeen ah, laakiin waxaan jeclahay inaan ku nolaado, farxad ka wanaagsan midda ay ku noolyihiin maalqabeenada.

Lacagta baabuur raacayga ayaan qeyb kamida u keydsada maalinkasto, si aan maalmaha fasaxa ugu tamashleeyo oo aan nafteyda ugu soo dalxiisiyo, waana ku han weynahay inaan maalin uun noqon doono qof maalqabeen ah. Uma ciishoodo dhallinta asaageyga ah oo waalidkood hantida u tacbay sida ay u tamashleeynayan, waayo waxaan ogahay in farxaddu iyo guushuba ineysan ku jirin waxaa laguu tabcay, laakiin guusha dhabta ay tahay mida aad gacmahada ku kasbato.

Daruufuhu wexey isku dayaan iney iniyad jabiyaan, laakiin waxaan ogahay in daruufuhu aysan cidna la dhalan, dhibkuna uu yahay saansaanta guusha.

Waxaan jeclahay inaan ka baxo noloshaan hoseynta ah, si aan ula talaabsado dunidan tagtay.

noloshu waa sidii buugga oo kale waa ay wajiyo badantahay sida buugguba u cutubyo badanyahay, waxaan jeclahay dalxiiska iyo nolosha lamaanaha, waxaan markasto raadiya dheymantii nolosheyda dhameystiri leheed.

Aniga ma ihi ragga jecel dumar badan iney la saaxiiban ama ku hamiya iney dumar badan guursadan, laakiin waxaan ku hammiya inaan helo gabar ka karti badan kun gabdhood, quruxdeeduna aanan dheymanka xitaa lagu doorsaneyn oo xillikasto garabkeyga ahaato, si aan isku dhameystirno oo dhadhanka nolosha aan is dareen siino, laakiin rag badan waxa ay raadiyaan gabar dhameystiran laakiin waxa ay ilooben ineysan jirin qof dhameystiran oo la iskugu abuuray inay iyagu isdhameystiraan rag iyo dumarba.

Waxaan dareemaya in ay nolosheydu isbaddal ku yimid, waxaan ahaa ruux iska faraxsan oo iska kaftan jecel, laakiin maalinba maalinta ka danbeysa waxaan arka in ay nolosheydu uu fikir ku soo biirayo iyo aamusnaan. Waxaan billaabay inaan ka dhex baxo qoyskeyga iyo asxaabteyda si aan kali u ahaado.

Dadku wexey ileeyihiin, Axmed kaftankagii iyo furfurnaantadii aaway, maxaa ku helay, jecel miyaa

ku galay?. Laakiin waxaa oo dhan iguma socdaan, kaliya waxaan doorbidaya kalinimada iyo fikirka inaan wehel ka dhigto. Dadku wexey ileeyihiin Axmed adiga jecel miya ku haayo, laakiin anigu ma aaminsani mida kaliya dadka uun ban ka maqli jiray, laakiin inuu anigu igu yimid ma aheyn midaan rumeysan karayo, oo waxaan nafteda ku sasabayay iney jiro kale iheyso.

Waxaan go'aansaday inaan markale tagin baarka, sababto ah marrabo iney run noqon waxaa ay dadku igu tilmaamayaan.

Saaxiibadeyda ayaa ii yimid, wexeyna iga codsadeen inaan u wada baxno bashaalkii jimcaha. aniga waan ka diiday oo waxaan ku dhahay "asxaabbey, aniga bixitaan igama heyso ee adinka iska baxa", maahir ayaa igu yiri "saaxiib, maalmahan dhanba wad murugeysneyd ee inakeen aan wada baxne si uu madaxa kuugu soo dago'. Aniga ayaad moodda inaan labo qof ahay, oo qeyb iga mida wexey baxsad u tahay bixitaanka, qeyb kalana aniga ayeey itaageersantahay oo bixitaanka ayeey diidantahay, kama danbeyntii wan ka ogolaaday saaxiibadeyda inaan wada baxno.

Markii aan soo aadnay baarka kafeyga, waxaan dareemay nafis iyo furfurnaan badan oo waxaanba

noqday qof saciid ah, wanba garan waayey sababta.

Markii aan so galnay baarka waxaan si toos ah usoo abbaaray, meeshii an warqaha farriinta isu suri jirnay, markii aan warqadda gacanta ku qabtay ayaan waxaan dareemay farxad laba jibbaar ah, waan eegay oo waxa ay iguso jawaabtay “wiil waalan ayaad tahay sideed ku awoodday inad farriin alwaax iisurto oo aan anigana kaaga soo jawaabo, laakiin run iisheeg baarkan dartey miyaad u timada wanba ka yaabbe?.”

Aniga oo yara faraxsan baan saaxiibadey u imid, qof walbo wuu aamusna oo aniga oo ii eegayay, waxaan ku dhahay “saaxiibayaal maxa idin helay?” midna imusan jawaabin, waxaan ku dhahay “waxaad doontaan iweydiiya wan idinkaga jawaabaya kaliya ila hadla.”

Maahir baa igu yiri “haddii aad sirtaada inaga ilaashaneyso, maxaad inoo leedahay dhiigenna ayan isku hureynaa.” Eedeyn badan kaddib waxaan ku qasbanaaday inaan uga sheekeyo waxaa jiro iyo gabadha aan ka helay.

Kaftankeeni iyo wada qosolkeeni waxaan sii wadanaba waxaan dhagaheyga u so dhacay aadanka salaadda maqrib waxaan eeg eegay

gaararka laakiin meysan iman oo baarkuba wuxu igula muuqday cidlo hadeysanba iyado dhex joogin goobtan, waxaan la kala baxay warqad iyo qalin waxaana ugu qoray “maanta kobashiinku wax dhadhana maleheen, baarkuna nuur maleheen sababto ah adiga naga maqna.”

Waxaan gareystay inaan jeclaaday gabadhan, si kastey ahaataba wan aqbalay waxa ay dadku igu tilmaamayan.

Markii aan xaafadda kusoo noqonnay ayaan arkay xaafadda oo tagsi hortaaganyahay, waan usoo yara deg degay aniga oo is leh, talow qof qoyska kamida amuu dhib gaaray oo hadda isbitaal loo wadaa ama laga keenay, markii aan guriga soo galay ayaan walashey iga yar weydiiyay waxaa dhacay, waa mahad alle wax dhiba sida u weyn imeysan sheegin oo waxa ay igu tiri “haboyar oo iska xanuunsan ayaa arrimo caafimaad ah Muqdisho u timid.”

Waxaan u imid habo si aan xaal wareysi iyo saalan isku dhaafsanno, sheeko dheer kaddib wexey ii sheegtay iney buro la dhibantahay ayna qalliin u timid halkan.

Waxaa masuuliyad la iiga saaray inaan haboyar isbitaaladda magaalada, u wadwado ilaa ay hesho

dhaqtarkii qalliinka ku sameyn laha maadaama ay dadku dhowr dhaqtar u ammaneen, Aniga howl kale ma ana lahayn oo jaamacadii wey ii xirneyd.

Muddo bil dhan ayaanu kadaba wareegeynay isbitaallada magaalada, kama danbeyntiina wexey inoo sheegeen inaan qalliinkan gudaha dalka waxba looga qaban karrin, ee dibada loo qaado, meesha ugu dhowna ay tahay in loo qaado dalka hindiya.

Muddo bil ah waxaan firaaq u waayay tagista baarkii aan gabadha darteed u aadi jiray, waxaan aad ugu mashquulay oo murug igu hayey habo caafimadkeeda. dhanka kale waxa ay indheheyga u oomanayen arigtada qofka uu qalbigu jeclaaday, waxaana dareemaya iney fahmi karto waxaan u qabo.

Habo iyo hooyo wexey go'aan sadeen, in habo hindiya ay u anbabaxdo oo halka caafimadkeda logula soo tacaalo, oo aan anigana garabkeeda noqdo oo aan safarka ku wehliyo, waxaaba inta sii dheer in tigidhadiina lasoo jaray. Markii arrinkaa la iisheegay aadban uga naxay, oo waxaa uu igu noqday safarkan caqabad inakala fogeyneysa, aniga oo iyo qofka aan jeclahay.

waxaan dhaha ayaan garaan waayey, waxaan isku

dayey inan marmarsiyo sameysto, laakiin hooyo ayaa igu tiri “waa amarkeyga, waana go’aankeyga” waxaan ku dhahay “waayahay.”

markii aan kasoo dhaqaaqay, waan xakameyn kari waayey xanaaqeyga iyo go’aan kan qasab ka ee ay iska qaateen, illin ayaa dhabanadeyda soo dhaafeysa, xanaaqeyga ayaa sii siyaadayey,si kale oo aan ku xakameyo ayaan waayey waxaan ku orday waddo dheer oo guriga iyo laamiga isku xerto, waxaan ordayey muddo ka badan saacad iyo bar, aniga o aan ka warheyn halka aan u ordaaya, kaddib ayaan darjiin yar fariistay, dukaan mesha ku yaalla ayaan galay si aan biyo caafi uga iibsado, markii uu jawigeyga dagay oo aan biyihi cabay oo kisna aan madaxa isaga shubay ayaan hareeraha eeg eegay, waanba wax toban tallaabo dhan u jiraa aargada weyn ee lambar afar km4 (kilo metre four), waanba rumeysan waayey inaan orod kaga imid huteel towfiiq ilaa km4, daal fara badan ayaan dareemaya jajabkii aan jeebkeyga ka helayna caag qajacle o biyo caafi ah ayaan ku iibsaday, oo xitaa hal shilin iga sii dhinna, aniga oo socodka karahsanayo oo fikirna iisii dheeryahay oo marsha biyeediga ku socdo sidii qofaad mooddo gabar gudan oo kale oo soco layiri ayaan luudayey, waxaa si kadis ah u arkay qof mooto bajaaj igusoo ag baakimtay oo ileh

“walaal, aan kusii qaade ina keen xaggeed u socotay”, malaha qof dhaawac buu imooday, wanba ahaye, sow tan qalbiga ka dhaawacanahay.

waxaan ku dhahay “walaal iska shaqeyso, aniga wax qarashaad ah mawatee meel dheerna waan u socda hee”, waxaa lama filaan igu noqotay inuu igu yiri “walaal, bini aadminimaduba shaqadey ka mid tehee, ina keen wax lacaga kama rabe.” wan maleysan waayey iney wali ku danbeyaan dunida dadkaan oo kale, waxaan soo raacay mootadii, wan wada sheekeysanay isago magaciisu igu sheegay Cabaas, uuna yahay ruux jecel is garabsiinta, wuxuna isku dayayey inuu mar waliba farxad idareensiyo oo uu iga saaro jawigan murugada leh.

Cabaas waxaa hadalkiisa igaga muuqday inuu yahay qof jecel horumarka naftiisa iyo tan dadka kalaba, wuxu iisheegay inuu galin jaamacad dhigto galinna uu noloshiisa dhacsado uuna xaas leeyahay, laakiin aan wali aabo la dhihin.

Waxaan si ammaan leh ku nimid meel aan sida uga fogeyn gurigeyga, waxaan kala qorranay lambarrada, waxaana aad ugu mahadceliyey siduu ii garabsiiyay iyaddo ay tahay xilli danbo habeen ah.

Hooyo ayaa iga hortimid albaabka, wexeyna

iweydiisay halka aan ka imid sacadaan habeennimo, si aysan murug u dareemin ayaan ku dhahay guriga maahir ayaan kuso daahay.

Markii aanu waabariisanay ayaan banaanka fikir la soo fariistay aniga oo ay dadku imoodan inaan isaga cadayanayo.

Cabbaar kaddib Maahir ayaa ii yimid isago ka imaaday dhanka laamiga, wuxuu igu yiri “saaxiib, waayadaan gaabis badan iyo kali ahaansho ayaan ka dareemaya, ee maxaa kugu so kordhay iisheeg”, waxaan u sheegay inuu bixitaan igu soo wajahan yahay, oo habo aan safarka hindiya ku wehlin doono.

Maahir aadbu ugu farxay oo isaga wuxuu jeclaa safarrada, wuxuuna igu yiri “saaxiib waa fursad dahabi ah aad waayo aragnimo badan kusoo qaadan doontid, oo uu fikirkan badanna kusoo iloobi doontide”, wan u yar dholacaddeeyey mid aan qalbiga jirin, waxaan aad uga walwalsana ka fogaan shaha aan ka fogaanayo jecelkeyga cusub iyo qoyskeyga iyo asxaabteydaba.

Galabtii waxaa ii yimid asxaabto wada socoto, wexeyna igugu hambalyeyen safarkan aan ubaxayo, wexeyna iga codsadeen inaan jimcadaan aadno

damashaadkii ugu danbeeyey si ay iguso wada macsalameyaan, aamusnaan gaaban kaddib wan ka ogoladay, sababto ah wexey ii eheed jaanis wanaagsan oo aan kula kulmi karo jecelkeyga.

Galabta waa galab kaloo jimco oo jawiyadii hore igaga duwan, waxaan dareemaya saxansaxo jacayl iyo murugo ka fogaanshihiisa, ma aqaanno si aan ugu sheegi doono jecelka aan u qaaday iyo bixitaankan dabada iga riixaya.

Waxaan wada nimid baarkii aan ugu magac daray baarkii nasiibka, waxaan eeg eegay hareeraha meysan joogin goobta.

Waxaan hal-haleel u aaday bartii aan farriimaha u suri jiray, waxaaba ii suran saddex farriin, waxaan niyadda iska iri iyaduba waaka ku doon dooneyse, markii aan kala furay middii kobaad waxaa ku qorna “maxaa kugu dhacay kumana arag waayadaan”, mida labaadna waxaa ku qoran “gabadhii indhaha qurxooneyd aadbey kugu xiistay, adne ma u xiisin miyaa?”, waa layaab talow mida saddexadna maxaa ku qoran “walaal waa iga dhab, waan kuu xiisay waxaana jeclaan lahaa inaad ila soo xiriirto” farriinta waxaa dhanka hoose karaacsan telefon nambar, aad uguma aanan baraarugsaneyn iney iyaduna si dhaba ii jeclaatay, waxaan xaqiiqsaday

inuusan jacaylkenu haldhinac aheyno labada dhinac ka socdo.

Waxaa aad isoo fiirinayey mid kamida shaqaalaha baarka e fadhiya ama qaabilsan dhanka makiinnada shaaha, markii ay indhehenna isku dheceen ayuu ii gacan haatiyay, niyadda waxaan iska iri talow muxuu ku dhihi doona, wuxuu iweydiiyay iney jirto qof aan farriimo isdhaafsiisan jirnay, waxaan isku dayey inaan qariyo hadanna waxaan niyada iska iri “armadaad wax ku dana ka heshaa”, waxaan ku dhahay “haa walaa”, wuxuu ii soo bixiyay warqad, wuxuuna iisheegay iney gabadha waayadan iraadineysay oo xitaa ay ka codsatay inaan lambarada kiliintiga uga dhex raadiyo lambarkad lacagta ku bixin jirtay, laakiin nasiib xumo waan u heli waayey.

Waxaan u deg-degay inaan lambarkeda waco, codka shirkadda simka ayaa igu leh “lambarka aad wacday waa u dansanyahay”, waxaan u dagdagay inaan saaxiibadeyda la wadaago.

Maahir ayaa ku taliyay horta inaanan deg degin oo aan warqadda aqrinno si an tixraac uun uga helno warqadda.

Sadarkeeda ugu danbeya waxaa ku qoran ciwaanka

ama tilmaam guri, waxaan aadnay gurigii inola talimaamay oo ku yaalay xamar weyne ceelgaabta agteeda, markii aan tagnay gurigii ayaan gargaraacay <alla jecelku illeen waali wax ma dhaamo>, waxaa inaga furay gabadh yara bilicsan o aad mooddo in dhawaan la soo aroosay, waxaan weydiiyay “walaal qoyskii gurigan dagna ma joogan?”, wexey dareentay inaan dad raadineyno, wexey inoo sheegtay iney guriga dagantahay wax ka yar tobban maalmood, aysanna aqoon u laheyn wixi horay u daganaa. waan isaga tagnay, waxaan u gargaraacnay cidda dariska la ahayd, waxaan weydiinay qoyskii daganaa guriga ku dhaggan halka ay u guureen, waxaa nagula dhahay muddo 25 maalmood ku dhow ayaay ka maqanyihiin wexeyna u guureen halka iyo kenya.

Waa-cusub baa ii baryay, waxaan noqday ruux isku buuqsan oo aad mooddo inuu shoogsanyahay, waxaan hal-haleel uga soo baxay guriga. saaxiibadeyna waa ay iga soo daba yaaceen, iyago ileh saaxiib bal sug hainaga ordine.

Waxaan indhaha so kala qaaday aniga oo sariirta hooyo jiifo, oo ay hooyana i ag fadhiso, waxaan weydiiyay waxaa igu dhacay iyo goorta halkaan lai keenay waxa ay igu tiri “hadalka badan iska daaye,

hoo kaniiniyashan cab", saacado kaddib marki aan roonaday ayaa waxaa iso wacay maxamed oo igu yiri "saaxiib, waa sidee caafimadkaga?" waxaan ku dhahay "war waan wanagsanehe, maxa igu dhacay?", wuxu iisheegay sida ay wax iso gaareen iyo inuu gaari jug isiiyay.

Dawadu wexey bogsiisay jirkeyga, laakiin awood meysan u leheen iney qalbigeyga bogsiiso, waayuhu kala daran habeen iyo maalin isku mid bey ii noqdeen, fikirkuna wuxuu ii ahaa wehelka kaliya ee aan i cidleyn, waxaan isku dayaa inaan is moogeysiyo xanuunka qalbigeyga hayo, laakiin ma awoodo inaan moogeysiyo illinta dhabneheyga ka da'aysa sidi dayr curdun ah.

Gabay iyo geerar midna ma aqaanno, laakiin afkeygu waxaa hal qabsi u ahaa ama u halheys ahaa sida tan :

.Dawo ma u helaya dareenkan qalbigeyga daashaday.

.Duunya luntaan maqli jire, dadkuna miyuu kala luma.

.Dartaa baan kalinimo u doorto, dadka kaga

takoorme.

.Daruus aanan dhiganiyo, durbaan bad ii tunte.

.Dantii dayuuradda ku saartay wallee darxumo maxay I badday.

Waxaan niyadeyda ku qanciyay inaan ku sabro wax kasto qaddar ku dhacay, o aana is heli doonno, haddii uu calafku mid yahay, waxaana xaqiiqsaday iney waxkasto qadar yihiin, tanina wexey aheyd oraah dhab ah oo qalbigeyga dajisay, sababto ah xaqiiqadu waa biyo kama dhibcaan oo malaha meel loo dhaafo.

Hal maalin kaddib waxaan u anbabixi doona safarkii hindiya ee aan ku wehlinayey haboyar, waxaa fursad ii ah inaan tagi doono dalka labaad ee dunida ugu dadka badan, waxaana ku hammi weynahay iney murugadu halkaa aan kuso iloobi doono oo aan kasoo qaadan doono waayo aragnimo, aana ku soo arki doono wax yaabo cusub

haddey ahaan leheed, diimo kala duwan, goobo taariikhi ah, dhaqamo kale du-duwan iyo cunnooyin kale cayn ah ba.

Safarkii Hindiya

Iminka waxaanu soo caga dhigannay garoonka weyn ee INDHERA GANDHI INTERNATIONAL AIRPORT, New delhi, oo ah magaala madaxda dalka hindiya.

> Hadda waxaa ay indhahaygu qabanayan, dhagaheyguna kuso dhacaya dhawaqa boorsooyinka lajiidaya iyo dayuuradaha sii kacaya ama soo dagaya.

Waxaan arka dad badan oo taagan qeybta soo dhaweynta oo sita boorar ay magacyo ugu xardhanyihiin iyo dadkale oo si ay kalgacal ka muuqato laabta isu galinayo oo aad dareemi karto iney yihiin dad muddo badan kala maqnaa.

Waxaan arka laamiyo waa-weyn oo aad la yaabbeyso saxmadda iyo cariiriga ka jira.

xaafado badan ayaa nalaso hordhigay waxaana ka soo doorannay inaanu dagno xaafada gandhii nagar ee Seelampur, delhi oo aan faallo yar horay uga heysannay.

Hadda waxaa aan saaranahay tagsi waxaan aad ugu mashquulsanahay bilicda magaalada,

> In badan waxaan maqli jiray, hindidu iney yihiin dad sabool ah, laakiin imika xaqiiqada taa waa ay igala duwan tahay, magaaladu waa magaalo aad u bilicsan ayna ka dhisan yihiin dabaqyo ka dhaadheer kuwan dalkeyga kuso arkay iyo dhul wada camirran oo sharikadaha ganacsiga, bangiyada, isbitaalada, iyo jaamacaddaha oo aad dareemi karto loolanka adage ka dhaxeyo, intaa waxaaba ka marneyn macbadyada oo ah goobaha lagu cibaadeysto sida masaajidada, kaniisadaha iyo mandirada iyo gooba kalo ay dad diimo kale leh ay ku cibaadeystan.

Waxaanu nimid meeshii aanu guriga ka kireysan laheyn, inkasto aanan awoodin inaanu kireysanno huteelada waa weyn ee magaalada ku yaallo, laakiin waxaanu laba qol ka helnay dabaq ay daggan yihiin kireystayaal badan, oo hindi iyo ajaanib kale isugu jiraan.

Labo maalin kaddib oo aanu ka nasanay daalkii ina hayey, ayaanu uso kabo xiranay dantii aanu u nimid halkan, waxaan tagnay isbitaalka weyn ee MAX HEALTHCARE. oo aad inoso dhaweyay kolkanu u sheegnay inaanu uga nimid dalka soomaaliya.

> Wareysiga dhaqtarka kaddib wuxuu dhaqtarka inoo sheegay in ay ina qaabili doonaan, wexeyna inoso cilaamiyen in qalliinka <operation> ka la fulin doono 4-todobaad kaddib oona la sugayo dhaqtar gobalkale ugu maqan howlo caafimaad.

Waxaan aad uga walwalsana asbuucyadan dhan oo aan guriga kala iiga ku noqonayo, asxaabteydii, qoyskeygii iyo jecelkeyga aan kala lunnay, inaan intaba kasoo wada fogaaday. Wehelka kaliya ee ii haray waxaa uu noqday fikir, waxaadba mooda inuu waqtigu aad u dheeryahay, saacadihii ayaaba maalmo ila muuqday. Mar internet isticmaal, mar Tvga daawo, mar habo la sheekeyso, maalintaa oo dhan baa si dirqi ah igu dhamaatay.

> Subaxdii xigtay waxaan toosay aroor hore, oo aan wali salaadda subax la galin, waxaan jecleystay inaan masjidka aado, oo marka cabbaar inoo jiray, markaan habo usheegay ayeey igu tiri “ war waad lumeysahe iska joog”, laakiin waan ku madax adeegay aadistisa ilaa ay iga ogolaatay.

Markii aan ka soo laabtay salaadda ayaan waxaan iska fariistay guriga hortiisa, waxaa mesha iguso maray dad badan o kala duwan o isugu jiro rag iyo

dumar oo xiran dharka isboortiska iyo kuwa kalo fanaanado caadi ah iyo dabagaabyo xiran oo shaarica weyn ku ordaya.

Layaab ayeey igu noqotay, sababto ah ma ahaa dhaqankan dhaqan ku badan dalkeena amaba aan inta badan arki jiray.

Meesha waxaa iguso maray, nin ay da'diisa aadantahay sodomeeyada dadka ku dhaw, markaasu igu yiri (chalo) iyo hadalo kale oo aan fahmi waayey, marka ba ingiriis jacbur ah ayaan ku dhahay "iga raalli noqo, kuma fahmi karayo, aniga hindus ma ihi, ee soomaali Ayaan ahay", kolkasu isago dholacadeynaya ingiriis ahaan igu jawaabay oo uu igu yiri "soomaalidu waa dad an aad isku shaabahno, ee jimicsiga orodka makusii wadaa walaal?", halkii baanu iska sii wada raacnay inago orodka ruclaha kusii wada sheekeysanaya, kaga darantii labada yaduba ingiriiska aad uma naqaanno oo si qasab ah ayaanu isku fahmeynay, Halka baanu isku barannay isagoo magaciisu igu sheegay Kabiir.

Orodkii jimicsiga kaddib waxaan kuso noqday guriga, maalintana waxaan ku dhameystay si aan sidii shalay dhaamin.

Maalinkii xigay ayaa subaxedii ii dhashay, markaan masjidka ka imid ayaan soo hor fariistay guriga, daqiiqado kaddib waxaa halkii iguso maray Kabiir oo aan jimicsiga orodka saaxiibo ku noqonay.

Kabiir waa ruux dabci wanaagsan aad ayaanu isku fahannay, waxaana is dhaafsanay arimaha shaqsiga, waxaana u sheegay inaan xaafad jooga aad ugu caajisay, wuxuna igu yiri “taas ma iyada dhib leh, maqaayad weyn ayaan maamule ka ahay, halkas iska imow oo jawiga magaalo sii kala baro inta laga gaarayo ballanta dhaqtarka”, aad ban ugu mahadceliyey sida u ii garabsiinayo.

Markii aan guriga tagay ayaan habo waayey oo aan garan waayey halka ay aadday, markii aan wacay ayeey igu tiri ma dheeri guriga dariska ayaan jira.

Markii ay timid ayey ii sheegtay iney isbarteeno maamo yamani ah oo halkan u joogto arrimo caafimad sidena oo kale.

Marka kaddib ayaa habo u sheegay inaan guri jooga ku caajisay, oo aan rabo inaan magaalada iska soo joogo. Wexey igu tiri waa caadi, wax dhiba malahan haddan cidlo dareemana mamadan dariska nala ah ayaan iskala so sheekeysana.

Habo Leyla waxaa ay aad u taqaanna luuqadda iyo dhaqanka carabta iyado muddo dhan 8 sanno kasoo shaqeyneysay dalka sacuudiga.

Tanina wexey jaanis ii siisay inaan magaalada kaso daneysto iyado habo aysan cidloneyn oo ay isbarteen qof ay is dhaqan fahmayaan.

> Walaal Kabiir markii aan ugu imid goobta shaqada, Kabiir aad bu igu farxay, wuuna isoo dhaweeyay, waxaana u sheegay si kaftan ah inaanan agtiisa marti ka ahayn oo aan dadka asxaabta la mid ahay.
>
> Kabiir waxaa uu igu yiri “walaal marti baad noo wadatahay , xaq badanna wad nagu leedahay, inta aad dalka ku sugantahay .”

Kabiir waxaan usheegay inaan fadhi guriga kusoo nacay oo aan u baahanahay waxaan ku mashquulo, waxaana ka codsaday inaan kabalyeeri ka noqdo maqaayada waliba si bilaash ah, si an ugu mashquulo.

Kabiir aadbu arrinka igaga xumaaday, wuxuuna iisheegay iney ceeb ku tahay qof marti ah iney ku shaqeystan, laakiin kama danbeyntii waa uu iga ogolaaday, halkaana waxaa igaga soo baxay

waxaan ku shuqloodo.

Marka kaddib, wuxuu isugu yeeray dhammaan shaqaalaha baarka ka shaqeeya, wuxuuna usheegay inaan ahay qof cusub oo kuso biiray, oo muddo gaaban la joogi doono, waa ayna isoo wada dhaweyeen.

Kabiir wuxu iisheegay inaan barri sitoos ah u shaqo gali doono, laakiin maanta aan goobta iska dhex joog joogo.

Markii aan guriga kusoo laabtay ayaan imid habo ii yar careysan oo ii walwalsan, hadalkii kowad ee ay igu dhahdo wuxuu noqday “markale makuu ogolaan doono inaad baxdo.” Kaddib waxaan ku qasbanaaday inaan uga sheekeyo arrintii ina dhex martay aniga iyo Kabiir, marka kaddib bey igu tiri “maxaad naftaada u dhibeysa hadad qarash u baahantahay aniga ku siinaye, iskadaa rafaadkas”, waxaan ku dhahay “Habo, maskaxdeyda fikir iyo arrimo badan ayaa ku furan, marka si ay murugada igaga yaraato ayaan jecleystay inaan nafteyda mashquuliyo”, kaddibna waa ay ii ogolaatay habo.

Waxaa ii dhashay subax aad mooddo inuu ka duwanyahay subaxyadii hore, markii aan ka nimid orodkii jimicsiga aniga iyo walaal Kabiir, ayaan ku

dhahay mar aan wada kaftameynay “iila dhaqan sidaad ula dhaqanto shaqaalaha, si aysan u dareemin inaan aniga martinimo dheerahay”, isagoo qoslaya ayuu igu yiri “haddii aad shaqada waqtigeeda ilaalin weysid ogoow, ciqaabteda bad miri”, waxaan ku dhahay “maamulnimada aadbad ugu wacantahay, oo waxaad tahay ruux caadil ah”, markasu igu yiri “walaal ahmed, maxaad sidaa oo dhan qalbigeyga ugu kasbaneysaa?.”

> Waa subax hore oo ay wali sideeddii subaxnimo isku taagin saacaddu, waxa ayna gandaha ku heysa waqtigii shaqada lagu balamay, waa maalintii igu horeysay ee aan shaqo aadayo, waxaan dareemaya farxad ay firfircooni ku dheehantahay. waxaan so istaagay laamiga, baskii waa uu iga tagay hadii aan isku dayana inaan sugo kan xiga waqtiga ayaa igu dhacaya, waxaan kireystay mooto bajaaj, waxaana u sheegay inaan shaqo ka dahayo, oo deg deg igeeyo goobta an kula heshiiyay.

Markii aan imid goobta shaqada ayaa waxaa markale shaqada igu soo dhaweeyey shaqaalihii meesha, waxaan soo xirtay yunifomkii loogu tala galay in baarka looga shaqeeyo. waxaana codsaday

inaan la galo sawirro xasuus ah, subaxan aadbey igaga duwaneyd subaxyadii horay nolosheyda usoo maray, waxaana si qaas ah sawirro ula sii galay walaal Kabiir.

Waayuhu iyo waqtiguba kala wacan, waxaan si toos ah u billaabay shaqadii mutadawacnimada ahayd, waxaan subax kasto u jarmaadi jiray shaqo aniga oo aad mooddo in laygu yiri haddii aad shaqada kasoo habsaanto mushaarkaga ayaa laga jari, waxaan aad u kasbaday qofkasto kamida shaqaalaha meesha aan kawada shaqeyno ilaa ay igu yiraahdeen “soomaalidu ma sidan bey u niyad furantahay”, dhammaan shaqaalaha meesha kuma usan jirin wax muslim ah, laakiin waxaa cajiib ahaa iyago isku diin ahayn iney aad u ixtiraamayen diinta islamka, xitaa marmarka qaar oo ay shaqadu aad ii mashquuliso ayeey idhihi jireen “Axmed waxaa la gaaray xilligii ay muslimiintu dukanayeen, ee shaqada inagaa sii wadeene, waajibkaga so gudo.”

Asbuucyadii aan la joogay walaal Kabiir, waxa ay ii noqdeen xasuusyo taariikhi ii ah, oo nolosheyda waxbadan iga baddalay, waxa ayna ibareen in lashaqeysta iney tahay wax wanaagsan, oo waliba si daacadnimo iyo farxad aad ku qaabisho noloshada.

Markii ay ino soo idlaaden maalmihii uu dhaqtarka inoo qabtay ayaan u dhaqaaqnay inaan u diyaar noqono, oo waxaa lagaaray waqtigii qalliinka lagu fulinlaha habo.

Waxaa si guud loo baaray habo caafimaadkeeda, si loo guda galo qalliinka (operationka), waqtigii qalliinka waxaa ka harsan ilbiriqsiyo, hadda ayaa habo loo sii wado dhanka iyo saalada/qolka qaliinka, waxaan ka warhelay, walaal Kabiir iyo dhamaan shaqaalaha oo dhankeyga usoo socda, layaab bey igu noqotay, waana rumeysan waayey sida walaaltinimada iyo kalgacalka leh ee ay ii garabtaagan yihiin, oo waxaan mooday ruwaayad indheheyga ka hor daaran, waxa ay isisoo taageen garbaheyga iyagoo igu dhahaya “farxaddeenu waa mid, murugadeenuna waa mid”, waxaan ku dhahay aniga oo farxad la ilmeynaya”intaad garbeheyga taagantihiin ma murugoon doono, abaalkiinana ma gudi karo”, wuxuna ii ballan qaaday inuu igu garabsiin doono waxkasto garab aan uga baahdo, wuxu si qaas ah igu ballan qaaday inuu qaabili doono wixii cunto ah, inta aan isbitaalka ku suganahay,

Waxaan ku dhahay “walaal, haddii aan asxaan yar kuu sameyey ma aha inaad sidano dhan isku

kalifto", wuxu si niyad furnan ah igu yiri "ha iloobin inaad tahay martideena, ma waxaad rabta markaad wadankaga dib ugu laabato inaad tiraahdo hinduusku waa dad aan abaal leheen", markale ayaan is xabad galinay, saacado kaddibna waxaa si badqab ah loogu guuleystay qaliinka.

bilooyin koobo kaddib waxaan si bad qab ah kaga so baxnay isbitaalka.

Bilihii aan isbitaalka ku jirnay, waxaa waqti walba cuntada iyo wixii kaloo caawimaad yaryar ah ba inala garabtaagna walaal Kabiir, waxaaba inta sii dheera iney aad inoso garab qabatay gabar ka mida kalkaalisoyinka isbitaalka oo si xad ka bax ah ugu dadaali jirtay habo Leyla, oo aad iyo aad qalbigeena u kasbatay waxaana la oran jiray Aanika.

Aanika waxaa ay eheed gabar aad u qalbi furan oo shaqadeeda si daacad ah u gudaneyso, waxaa taa u dheera waxa ay qabiir ku ahayd sida qalbiyada dadka loo xado oo kalsooni badan looga kasbado, markii ay habo caafimaadkeda soo wanagsanaday ayaan u garanay inaan siino lacag abaalmarin ahaan, markii aanu isku daynay inaanu siinno ayay aad inoga xumaatay oo ay inagu tiri "wannaagii aan idin sameyey miyan idinka iibsada, maya taas macquul ma aha", si walbon yeelnay wanu ku kari

weynay, marki danbe ayaanu usoo iibinnay hadiyad oo ay inaga gudoontay, waxa ayna nagu tiri “waad iga guuleysaten.”

Waxaan dib uguso laabanay gurigii aan horay u daganeyn, si aan ugu diyaar garowno safarkii aanu dib ugu laaban laheyn dalkeennii hooyo, laakiin ani ahaan waxaan jecla inaan dalkan isaga sugnaado, sida ay dadkiisu u wanaagsan yihiin, sida ay maciishadiisu u raqiisantahay iyo jawiyadiisa aad ka u macaan.

Waxaan soo aaday guriga walaal Kabiir si aan uso macsalameyo aana uga mahadceliyo siduu isoo garab qabtay, markii aan u tagay oo aan usheegay arrinta bixitaanka ayuu aad uga xumaaday, wuxuuna igu yiri “ma ahan wax aan jecleystay arrintad iisheegtay, haddana ma awoodo inaan ku celiyo, laakiin waxaan jeclaanlaha intadan bixin ka hor inaan dalxiis macsalameys ah soo wada qaadano.”

waxaadba moodda inuu dareenkeyga dhan ay hogaaminayaan ereyada kalgacalka badan ee uu igu leeyahay walaal Kabiir.

Waxaan dalxiis qurux badan kuso wada qaadannay, goob aad u weyn oo dalxiiska loo diyaariyay oo

magaalada duleedkeda ah, laakiin waxaa goobta dalxiiska kaso dhex qaaday telefon nuucisa ah SAMSUNG galaxy S4 ah, waxaa looga dultagay kursi, laakiin waa u dansana, waxaan gareystay inaan qofkii lahaa ku raadiyo, si aan wanaag uga kasbado qalbigiisa.

Markii aan guriga kuso laabtay oo uu saacado kooban jaajar ku jiray ayaan shiday, si uu uso waco qofki lahaa. cabbaar kaddib waxaadba mooda inuu qof sugayey inta laga shidayo telefonka uu ba isha ku hayey.

qof ayaa soo wacay, marka buu af hindi igu yiri “walaal, waa iga codsi telefonka dib iguso celi xasuus farabadan oo aan weheshado ayaa igu jire e”, aniga luuqadda hindiga aad xariif uguma aheyn laakiin wan fahmi karay, markaa baan af soomaali ahaan waxaa iri “hindidan sidaane u calaacalayan, marka hore mey waxaa koga ilaashadaan”, marka bey codkii hore mid ka dheer ku qeylisay oo ay igu tiri “allaa ma wiil soomaaliyeed baa waxaa alaabtayda ii hayo, iga raalli noqo ajnabi baan ku moodaye”, layaab bey igu noqotay aniga xitaa, qofka telefonka leh inuu soomaali yahay, oo usan shisheye iga eheen, wada hadal dheer kaddib iyo isfahan ayaanu ku wada ballanay inaan isugu

imaanno xila iiga salaadda casarka kaddib meel kafateeriyo ah oo ka ag dhaweyd goobta caan ka ah ee Mcdonals.

Daqiiqado ka hor ayaan tagay goobtii ballanta, si aan naftayda jawi daganan ula qaato, waxaa ii muuqday xasuusta jacaylkii aanu kala lunnay, mar waan iska qosla oo waxaan xasuusta sidan isku baranay, marna waan ilmeya oo waxaan xasuusta sidey qalbigeyga u kasbatay iyo sida fudud aan isku weynay.

Markii aan saacad fadhiyay oo aan jawiga ka baxay, oo xasuusteyda an dul heyhaabaya ayaa mar qura waxaa isoo ag istaagay laba gabdhood oo ay igu yiraahden “qofka aan la ballansanen ma adiga walaal”, aniga o inaan eego wajigooda ka yar xishoonaya ayaan ku dhahay “haa walaalo soo dhawaada.”

Mar aan eeg maagay ayaan rumeysan waayay waxaa ay indheheygu arkayaan, waxaan kala garan waayay inaan wali qiyaaligii ku jiro iyo inan la joogo dadkii aan wada ballansaneen.

Gacmaheyga waxaa ay bilaabbeen iney tamartooda lumiyan, carabkuna uu hadalkuba kariwaayo, indhuhuna ay eegmo iyo illin kalgacal isugu

darayaan ruuxey arkayaan oo ah jecelkii horey uga lumay, iyaduna waa ay u adkeysan weysay illinteyda oo iyaduna waa ay iska oysay, anigu nin nimanba isku celinayaaye, iyadu waxa ay ku dul oysay garabka saaxiibteda caasho.

Caasho aad bey u jahwareertay waa ay fahmi weysay sida ay wax u dhacayan iyo sidey wax u jiran, iyadu waxa ay meesha u timid iney telefon ka lumay dib uso ceshato, laakiin waxaa ay sabab u noqotay iney isku keento qalbiyo kala lumay.

“Caaliya haa waa magaceyga, waa qofka aad jaceylka ku abuurtay,kaddibna aad isaga fogaatay, ma aqaano awoodad ii isticmashay oo aad qalbigeyga ku kasbatay, laakiin maxa u cidleysay qofka aad dartiis u iman jirtay baararka kafeyga” waxaa sida ku dhawaaqay Caaliya.

Waxaan isku dhiiriyay inaan u jawaabo waxaana ku dhahay “isma lahayn sida aad u jeceshay kadaran ayeey iyaduna kula dareemeysa jaceylka, waxaan islaha Axmed uma qalmo gabar sida u qurux badan, misna ka muuqato iney ka dhalatay qoys lacag leh, laakiin hada waxaad itusisay inuu qalbigaadu yahay midka dunida ugu qaalisan, mar gacantada ii dhiib waxaan ka ballan qaadaya inaan markale siideyn”, caasho oo ah Caaliya saaxiibteed laftirkeedu waa

ay iska ilmeysay waxa ayna dhahday “aniga jaceylka iyo xirirkuba waxaan ka aamisana nacasnimo, laakiin maanta waxaad i dareen siiseen inaan aniga ahay nacaska runta ah, waana idinku hambalyeyna inaad dib isku hesheen.”

> Caaliya waxaa ay igu tiri hada jawigeyga ma dagane markaan xaafada tago ayaan kulaso hadlaya. Marka kaddib farxad ayaan la duulduulayay oo aan maalinta oo idil maskiinkasto aan arko wax ku sadaqeysanayey.

Markii aan salaadda cisho soo dukaday ayaan usoo fara banaanaday inaan waqti la qaato, markii aan qadka furay ayaanba fariimo whatsappka iska soo daba dheceen.

Ay ugu horeyso “fiidnimo wanaagsan qaaligeygi”, marka ban ku dhahay “ma iga xishooneysid miyaa, maadaama aan horay wada sheekeysi fiican inoo dhex marin”, waxa ay igu tiri “ma koontaroli karayo dareenkeyga markaan adiga kula hadlayo, waxaana dareemaya dhameystirnaan iyo kalsooni badan, marka ma aqaan si aan kala xishoodo waxaa qalbigeyga ka guuxayo”, waxaan ku iri “hadiyad dhanka rabbi igaga timid bey ii eheed inaan adiga ku helo oo haddane sidan dhan kalsooni igu qaba.”

sheegitaan kuma qiyaasi karo, habeenka ereyadii dhex maray qalbiyadii isku oomanaa.

Waxaan kalo u sheegay inu safar dib u laabasho igu jiro oo uu dhamaaday arrimihiim aan halkan u imid, walaac badan bey ku abuurtay oo aadbey uga xumaatay inaan kala dheeraanno maadaama aan mar dhaw dib isku helnay, laakiin waxaan ku qanciyay markaan inaan si sahal ah ku kala lumi doonin, oo uu xirirkeenu ka xoog badanyahay sidii hore, oona sugayo kaliya inta ay jaamacadda ka dhameyneyso.

Waxaan u diyaar garoobayay safarkii aan dib ugu noqon leheen aniga iyo habo, waxaan so jaranay tikidhadii diyaaradda. Maalintii xigtay waxaan aadnay eelaboorka si aan uga ambabaxno, waxaa garbeheyga taagna Caaliya, Caasho iyo habo oo aan isbaray, waxaa iso wacay walaal Kabiir oo igu yiri “gaari baan soo saaranahay isug, waxan raba inaan ku macsalaameyo e.”

markas ka dib kaftan ayaan iska galnay oo marba ruux lagu shidanayo, markii aan Caaliya xageeda soo eegaba waxa ay ii bixineysay baaq indhaha ah si aan garoonka ugu soo dhex wareegno, markii danbe ee Habo iyo Caasho sheekadodu isla jaan qaaday, ayaanu usoo ganbinay aniga iyo Caaliya si

aan waqti uso wada qaadanno, waxa ay so iibisay jaalato (ice-cream), sidanu uwada kaftameynay iyado garabkeyga socota oo aan isleenahay “aniga ka dheer iyo aniga ka dheer”, ayaan mar qura iyadon iga fileyn gacanteda qabtay, waa ay gariirtay oo xitaa jalaatadii ayaaba ka dhacday <alla inantu jilicsana iyadaba jalaataduba ka jilcane>, markii aan sii daayay ayeey iso eegtay, eegmo ay naxariis iyo kalgacal ka buuxdo, markasay jaalatadii ka dhacday qeyb kamida inta so qabatay iyado dholacadeyneysa indha igaga fardhisay oo ay iga oroday, aaah, waxaanba mooday in raxmad ay qalbigeeda kaso saartay ay indhaha igaga shubtay, alla jaceylku waalana, sidii ilmo yaro kale ayaanba isdaba ordeyna oo elaboorka weyn e NEW DELHI inala noqday inaan joogno goobaha dalxiiska ee ilmuhu ku cayaaran.

Markii aan habo uso laabannay ayeey Habo inagu tiri “ ma ilmo yar baad ismoodeen, waa maxay waxaad iskuso haleyseen?”, “een…een Habo waxaa waaye” waxaa sida yiri Caaliya oo is leh armey Habo idinku xanaaqda, marka bey Habo tiri “Bas..wan dareemi kara wax walbo, laakiin halkan ma aha guri aad wada dagantihiin” iyado madaxa ka salaaxeysa Caaliya ayeey ku tiri “ Nabad isku calmada, waxaad tahay qof ka sameysan farxad,

waxaad tahay wiilkeyga guushiisa, farxadiisa iyo noloshiisa oo dhan", aniga xitaa kama fileyn Habo iney sidaa dhan ii fahmeyso. Aniga oo indheheyga illin ku taagantahay, ayey laabta igalisay Habo oo ay igu tiri "wiilkeygi maxaad moodday inaan ku fahmi kareyn dhibka qalbigada ka guuxayay, iyo waxaa aad u oomaneyd iney eheed shimbirtan yar ee farxadda laga sameeyay ee Caaliya ah."

> In farxad lala ooya waan maqli jiray laakiin Habo Leyla waxa ay awooday, iney indheheena ka ilmeysiiso, afkeenuna uu dholacadeeyo.

Waxaan aad u daahsaday walaal Kabiir, sidaan u sugayey ayuu aad iiguso daahay, waxaan wacay lambarkiisa waxaana iga qabtay cod aanan garaneyn oo igu yiri "qofka aad so weceyso waxaa uu yaallaa isbitaalka weyn ee ARUNA ASAF HOSPITAL, shil gaari ayuu galay."

Telefonkii ayaa gacanteyda ka faniinay, naxdin darteed, Habo iyo Caasha iyo Caaliya oo meel aan sida igaga fogeyn taagnaa ayaa dhankeyga usoo cararay, aniga waxaan isku dayay inaan ordo oo dhanka isbitaalka u cararo, laakiin sameecadaha waaweyn ee eleboorka ayaan ku qeylinayo "dhamaan rakaabka diyaaradda inta dhimman haso

xaroodan, diyaaradda kicitankeeda waxaa ka haray ilbiriqsiyo.” Taaso ah digniintu ugu danbeysay ee diyaaradda, iyado daqiiqado ka horna amar ku bixisay in la so wada xaadiro.

> Markii aan u sheegay Habo inuu Kabiir shil galay ayeey igu tiri “ Habo ina keen, Uma maleynayo inay jiri doonto xilla iigan, xilli ka adag oo uu inoo baahan doono Kabiir.

Habo waxaan ku qanciyay in iyadu wada sugayaan ehelka oo dhan, oo aysan baaqan karrin, anigana aan diyaar u ahay inaan gudo abaalkii uu horay inogu soo galay walaal Kabiir, iyaduna aysan waxba isku kalifin, maadaama ay iyadu xaaladedu wada wanagsaneyn.

waxa ay igu tiri “ Habo, orod ducadeyda ayaa kula jirto e, waan ogaa inadba wala iigaba ahayd ruux is garabtaaga dhibanaha xiligu u bahanyahay, adiguna allah ku garab istaago e.” Waa hadalkii igu danbeyey oo ay Habo igu dhiirisay, Caaliya ayaan ku dhahay “Habo ii sii ogow intey ka duuleyso.”

aniga oo gantamaya ayaan hal haleel ugaso baxay irrida eleboorka, tagsiga ayaan ku dhahay “deg deg igu gee cisbitaalka ARUNA ASAF”, waxaana imid isbitaalka, markii aan imid ayaan weydiiyay

kalkaalisadii iguso horeysay, waxa ayna ii sheegtay inuu ku jiro qeybta gargaarka deg dega ah (emergency room).

Waxaan codsay in la ii keeno, telefonkisa black berry ga ah si aan u waco xaaskiisa.

Waxaa halka igu yimid xaaskiisa Juliya iyo dhowr qof oo kale oo kala ordaya.

Cabbaar ka dib ayaa dhaqtarkii soo baxay oo aan xagisa uso kala yaacnay, si aan wax aqbaar ah uga helno, waxaan uuna yiri dhaqtarkii “nasiib wanaag waa u ka badbaaday qatartii badneyd, oo kaliya lug iyo madax ayaa wax ka gaareen, laakiin hadda waa uu miir daboolanyahay.”

Intaa kaddib waxaan iska fariistay kursi alwaax ah o halkaa yaal, aniga oo la yaabban waqtigu siduu marna iiga qoslinayo, marna uu iiga oohinayo.

Ma garan karo, goor aan qaboobay oo aan ku raalli noqday waxaa soo gaaray saaxiibkeyga Kabiir, oo aanba is iri “waa kuma qofkan raxmada dhanka eebbe iga keenay oo aniga oo dhan i deeqday.”, markii aan kor u raacay gacanta garabkeyga saaran ayeey farxadeydu laba jibaarantay, waa Caaliya oo gacanteeda garabkeyga saartay, oo igu leh

“go’aanka ugu adag ee uu qaato ruuxa geesiga ah, xilla iiga adag, waa sabarka oo sibirna ka qaraar.”

Su’aalo badan ayeey maskaxdeydu iweydiineysa, oo aan wax jawaabo ah u heyn .

> Maxaan daganaan u dareema markey Caaliya i ag joogto?
>
> Maxaan farxad u dareema markey indhaha yagu isqabtaan?
>
> Maxaan lahaansho u dareema markey jirkeenu isgaaro?
>
> Maxaan kalsoon iyo dhiiranaan u dareema markay ila hadleyso?.

Kalkaalisadii ayaa inoo timid oo nagu tiri “waa uu soo kacay bukaankiina, wuxuuna ku dhawaaqaya, JULIYA iyo AHMED, ee labada qof ha loogu yeero hadeysan inta joogin xitaa.”

Markiiba waan u deg degnay aniga iyo xaaskiisa, markii aan cabbaar la joognay, ayaa dhaqtarkii inoso galay oo ino sharxay sidey wax u gaareen iyo inuu ka badbaaday halistii badneyn ee shilka, laakiin madaxa qeyb kamida iyo lugta ayaa wax kasoo gaaren, xaaskiisa ayaa iska ilmeysaneysa, oo aan ku dhahay “walaal Kabiir haduba wali awoodayo

inuu nala hadlo, ma ahaa inaad oysaa e waa inaad shukrisa.”

Habeenkii xilli danbe oo ay ku dhaweyd kowgii habeennimo, ayaa waxaa meesha noogu yimid Kabiir ehelkiisa oo ka yimid magaalada Faradabad, sida Hooyadiis, Walaashiis iyo qaraabo kale. waan isaga soo dhex baxay asiga iyo ehelkiisa, si ay waqti fiican iskula qaataan.

> Saacaddu waa shanti iyo qadar afartan iyo shan daqiiqo ah, waa aroor hore, waagu wali si fiican uma uusan baryin, walina ma aanan tukan salaaddii subax, waxaa dhacaya telefonkeyga oo saaran meel aan sida igaga fogeyn, waxaan maqla dhawaqa shimbiraha oo aad mooddo iney i leeyihiin kakac hurdada.

waxaan dareemaya madax xanuun iyo daalkii aan ka qaaday wixii shalay dhacay, markii uu telefonkii go’ay ayaan sariirta kasoo kacay oo aan eegay, waa habo Leyla, wan ka daba galay, markii ay iga qabatay ayaan isdhaafsanay salaan iyo ma nabad tagtay iyo Kabiir siduu noqday, kadib ayeey mar qura igu tiri hadal aan sida ugu baraarugsaneyn oo ah “Wiilkeygi ma u diyaar garowday inaad buuxiso booskii Kabiir oo shaqada halkeedii laga sii wado, si

aysan qoyska Kabiir u dareemin, masruuf la'aan maadaama usan wax kale heysan." Waxaan ku dhahay "Haa habo, waa an kaa huba inuu hadalkaagu, uu dib ii baraarujiyay, oo uu i xasuusiyay kaalin la iga baahna buuxinteeda." Hadalkii igu danbeyey inteysan qadka yaran ayaa ahaa "wan ogaa iney walashey geesi dhashay."

Markiiba waxaan isku boobay, qubeys iyo labbis si aan u guto waajibkan i horyaal, waxaan u imid ninka fadhiya qeybta kireynta qolalka huteelka, waxaana u sheegay inuu huteelkoogu aad ii cajab galiyay aana diyaar u ahay inaan bil kale sii daganaado, maadaama aan xalay qolka kireystay Labo maalmood oo kaliy inaan daganaan doono.

Waxaan tagay baarkii ama maqaayadii uu Kabiir maamulka ka ahaa, subaxa waxaan xirna surwal jiinis buluug xigeen ah iyo shaati madow iyo taay, shaqaaloho idil wey wada joogeen, oo lagama dareemeyn inuu maamulkoogu ka xanuunsanyahy, aadbey iiso wada eegen subaxa sida aan u labbisnaa ma ahayn labbis ay horay igu arki jireen.

Waxaan iskugu wacay dhammaan shaqaalaha, iney iskugu yimadaan qolka uu shirka shaqaalaha ku

qaban yiray walaal Kabiir.

Markii ay dhammaan soo wada xaadireen, ayaan hadlay, hadal aanan garaneyn siduu iguso dhaafay, oo kiciyay dhamaan shucuurta shaqaalaha dhan, oo aan u sheegay inaan shaqada halkeeda kasii wadi doonno, hadalkeygi igu danbeyana uu ahaa sida tan “Waxaanu nahay walaalo, waxaanu nahay dad isku garab ah, waxaanu u shaqeyn doonna si adag, si aan nafteena ugu horseedno karti iyo howlkarnimo.” Si qalbi furni ah ayeey igu dheheen, “waxaan kula shaqeyn doonna, si daacadnimo iyo kartiba ay ku dheehantahay, waxaana tahay maamulkeena, waana ku adeeci doonna.”

> Halkaasna waxaa igaga bilowday, cutub kale o cusub oo nololeed, waxaan qabtay xil maamul aan wali ku fakarrin, waxaa la iiga baahanyahay, xagdhowr iyo cadaalad, mana aqaan sidan u gudan doono shaqadan adag.

Markii uu shirkii inoso dhamaaday, ayaa albaabka qolka waxaa kaso galay nin aan wali horay u arag, dadkii o dhan na ay dhankiisa u yaacen, laakiin markiiba wan fahmay oo waxaa isaaciday magaca ay shaqaaluhu ugu yeerayen oo ahaa “Mudane Kumar birla”, magacaas oo uu walaal Kabiir wax badan igaga sheekeyay inuu yahay ganacsado

weyn, ahna milkiila maqaayadan, marka kaddib ayeey nafteydu ogolaatay iney si wanagsan u salaanto, maadaama wax badan wanaaggiisa la iiga sheekeyay.

Wan wada fariisannay si aan u dhageysano, wuxuuna hadalka ku billaabay sida tan “waan ka xumahay waxaa soo gaaray walaalkena Kabiir, wax yar ka hor ayaan ka imid isbitaalka oo aan ku soo booqday Kabiir, waxaan imid halkan adinka o shir ku jira, waxaana dhibsaday in uu shirka dartey u istaago, laakiin waxaa aad ii farxad galiyay sida kartida leh ee aad isugu duubantihiin, waxaana idin leeyahay halkiina howsha kasii wada.”

Qudbadiisi gaabneyd kaddib ayuu igu yiri “xafiiska igu kaalay”, inta aanan xafiiska galin ka hor ayaan aad uga walwalay oo aan is iri “talow jaanis ma u heli doonta inaad walaal Kabiir abaalkiisa u gudo, oo aad booskiisa buuxiso, mise qofkale ayuu keensan raba oo dalkaga ayaad dib ugu noqon doonta adigon abaalkiisa gudin”, aniga oo sidii u sheekeysanaya ayaan xafiiskii dalaq iri, aniga oo sugaya inuu i yiraahdo reer kaagii ayaa ku sugaye dalkaaga dib isaga laabo, ayuu aad iso dhaweeyey, su’aashii ugu horeysay oo lii weydiiyey waxa ay noqotay, gobalkee kasoo jeedaa? Waxaan ku

dhahay “dhalashadeydu waa soomaali”, markasuu aad ila yaabay oo uu igu yiri “macquul ma aha” waxaan uga sheekeyay sidan dalkan ku imid iyo sidan Kabiir isu baranay, markasuu aad ula dhacay, xitaa uu igaga sheekeyay, dad badan oo soomaali ah oo ay is garanayaan, oo ay ganacsiga ku saaxiibeyn, wuxuu kalo ii sheegay, iney soomaalidu yihiin dad aad ganacsiga ugu firfircoon oo shaqo badan.

Kaddib ayuu igu yiru “waxaan aad ula yaabanahay, dadku abaal iyo asxaanba wey isu galaan, laakiin midkan waa mid bini aadamnimada ku weyn, dad aan isku dhiig iyo dhaqan aheyn oo haddana sidan isu caawinayo, laakiin waxaan ku ballan qaadaya, adiga iyo Kabiir ba inaan si isku mid ah aan mushaarkiinaba u bixin doono, xitaa wixi mushaarkaga ka dheeri aad u baahato inaan kugu caawiyo ayaan diyaar u ahay, adigo ajnabi naga ah haddad sidaan noo garabtaagan tahay, maxaa diiday inaguna inaan ku garab istaagno.”

Markaa ayaan si ay kalgaceyl ku dheehantahay gacmaha isu galinay, oo masuuliyaddii ku xil wareegay.

Halkii ayeey iga billaabatay nolol midii hore ka duwan oo ay isaraantay masuuliyad adag.

Galabtii inta aan shaqada ka bixin ka hor ayaa waxaa isoo wacay shambirteydii Caaliya, waxaana ka codsaday inaan kulanno, way iga diiday oo waxaa ay iisheegtay ineysan habeenkii socon, markii danbe ayaan ku dhahay “dhib ban dareemayaa, ee ma icaaweyneysa?”, iyado warkale iguso celin ayeey igu tiri “xaggeen kugu imaada iisheeg?”, markiiba wan farxay oo waxaan ku ballamiyay Mcdonals meel u dhaw oo ah, halkii aan isku helnay, aadna u jawi dagan ay dadku u yimadan iney waqti fiican kuwada qaatan.

Markii aan imid ma aysan joogin iyadu waxaan billaabay inaan fakaro, oo aan ka fakaro waxaa mustaqbalkeyga iyo midka lamaaneheyga ino wada danbeyn doono, maadaama aan ahay wiil dhalin yara ah oo aan wali wax hanti ah shaqeysan, nus saac kaddib ayeey igu timid meesha, markii aan salaamay ayey igu tiri “waan ku xanaqsanahay ee ina fariisi”, kaddib waxaan billaabay inaan uga sheekeyo, nolosheenii hore iyo sidan isku baranay iyo sidey iso eegi jirtay, halkii ayaa waxaa ka bilawday, is dhex gal sheeko iyo kaftan nuuciisu weerar iyo weerar celin, waxaadba mooda inaan kaligeenna fadhino goobta oo ay cidkaleba fadhin sidan u fara cayaareyno iyo sidan u wada qoslayno, dadka qaar wey inaso eegayan, laakiin inagu miir

umalihin cidkale, waxaad daremeysa iney nolosheenu raalli iska tahay oo aanu nahay, dad la isku abuuray si ay isu dhameystiraan, farxadu waa dheeshena, noloshenu waa ay ilowda dhibkasto heysta xilla iiga aan wada joogno, goobta waxaan nimid maqrib kaddib, imikana saacaddu waxa ay afka kusii heysa sagaalkii iyo rubi oo fiidnimo, waxaan soo wada raacnay, mooto bajaaj si aan gurigeda ugu celiyo iyado ii nabad qabto, markii aan gurigeeda kusii dhaweyn ayaa mootadii naga halawday, waxaan ka codsaday inaan wadada kusii wada sheekeysano maadaama uu guriga sida inooga fogeyn, wax bey xusuusatay o waxaa ay igula soo booday “Horta..een. arrintii aan iskugu imanay kulankan dartiis, ma aadan iisheeginbe ee hada iisheeg”, socodkenii ayaan sii wadanay, waxaana usheegay masuuliyada adag ee isaarmatay iyo sidaan uga cabsi qabo inaan kaso bixi waayo.

Caaliya mar waa jacaylkeyga, nolosheyda marna waa waalidkeyga, marna waa lataliyeheyga.

Waxa ay aad igu dhiirigalisay inaan kasoo bixi karo shaqadan, o aan ahay ruuxii mas’uuliyaddeda qaadi lahaa, oo xitaa waxa ay ii raacisay inaan iyadu nolosheeda aan mas’uul ka ahay, waxa ay

idareensiisay iney isaarantahay masuuliyad ka weyn mida aan hada ka sheeganayo, oo ayna ihortaalo nolol adag oo shaqo badan iga baahan. Waxaan tagnay gurigeedii, markii aanu is macsalaameynay ayeey igu tiri wax muhiim ayan ku sheegaya dhagta aayar iso dhaweey, kolkii aan dhagta u dhaweeyay ayeey daanka iga dhunkootay deedna iga carartay.

Caaliya maskaxdeyda waxaa ay ku furtay su'aalo badan, waxa ay i dareensiisay in ay masuuliyad weyn ay isaarantahay mid waalid iyo mid lamaanaba, habeenka waxaa aan seexday aniga oo aad u fikirsan.

Subaxdii xigtay markii aan jimicsiga ka imid ayaan quraacday oo aan u diyaar garobay aadista shaqada, markii aan soo baxay, ayaan horay u sii maray isbitaalka, si aan walaal Kabiir u salaamo, markii aan soo galay qolka uu jifo Kabir ayuu isku dayay inuu kor uso kaco, si uu ii dareensiyo wanaaga uu qalbiga igu hayo wuxu igu yiri "arrintada oo dhan waxaa ii sheegay walaal kumar birla, waligeyna ma gudi karo abaalkaaga, mana aqaanno waxaan kugu mahadceliyo, walaal."

waxaan dacalka kaso fariistay sariirta uu jiifay, waxaan ku dhahay "walaalka ka yar miyad leedahay

abaal bad ii gashay, walaal Kabiir dhib walbo kuso gaaro, garab kaga ayaan taaganahay, mana laga yaabo inuu qoyskaagu wax la'aan dareman inta aan garabkaga ahay." Waxaan ka tiray ilmadii mahadcelinta iyo kalgacalka xambaarsaneyd, waxaana ku dhahay "walaal waan kaasii tagay, shaqo ayaa isugeyse."

Markii aan imid goobta shaqada ayaan la yaabay sida ay shaqaalaha oo idil ileeyihiin "Subax wanaagsan maamule" waliba iyago ii dholacadeynayo tasoo ay igu kaliftay inan shaqada subaxkasta usoo kalaho, markii aan fariistay korsiga maamulaha ayaa waxaa igu abuuray dareen cusub iyo dhawaq gudaheyga ka yeerayo oo ileh "maxaad ugu istaagi la'dahay hal abuurrida ganacsi aad adiga leedahay, oo subaxkasta markad soo galaysa oo ay dadko idil ku dhahayan "Subax wanaagsan Boss."" Waxaan go'aansaday inaan abuuro ganacsi aan aniga leeyahay, waxaan ku fakaray xaggeed wax ka billowda. Nafteyda waxa ay iigu sheekeysay inaan ganacsi abuuri kareyn iyado ileh: ma heysatid qarash kugu filan, ma heysatid qibrad kugu filan, marka maxaad wax ku bilowda?.

waxaan nafteyda u sheegay ineysan marmarsiyo

qasri ii dhisi doonin aana diyaar u noqdo inaan wax bilaabo.

Waxaan go'aansaday inaan xilli meesha maamul ka ahaado, xillina aan barto cunto karinta oo aan noqdo xirfadle cunto kariye ah, waxaan billaabay inaan go'aankeygii ficil u badalo, waxaan ahaa galinka hore maamulaha meeshan, galinka danbana waxaan isku aha maamul iyo arday diyaar u ah barashada cilmiga cunto karinta.

Waxaan halgan adag u galay oo aan geed gaaban iyo mid dheerba u koray, barashada cunta karinta iyo maamulida maqaayada iyo inaan farxad la qaato shimbirteyda oo maalinkasta aan warqado is dhaafsan jirnay iyado la heli karo inan kawada xiriirno baraha bulshada laakiin waxa ay ku madax adeegtay inuu jacaylkeena ka bilaawday warqado hadana uu sidiisi ku socon doono.

Mararka qaar ayaan faraha ka guban jiray aniga oo jecel inaan warqada aqriyo ee dhinaca kalena cunta karrin ku jiro.

Xitaa shaqaalaha oo idil waa ay barteen warqada markasta laikeeno iyo wax ku saabsan xirirka inaga dhexeeyo aniga iyo Caaliya, waxaanu noqonay maamul iyo shaqaalihiisa oo wada faraxsan, aniga

oo fikirsan haddey i arkan ama xanaaqsan waxa ay ku qeylin jireen “mudane warqad ayaa ku timid”, aniga oo ordaya ayaa xafiiska kasoo bixi jiray, o isla markaana wey iga kala dhuman yireen oo midkasta idhahayo “mudane hebala ku dhahay iyo hebalu ahaa.”

Laba bil iyo bar kaddib waxaa si farxad leh shaqada uguso laabtay walaal Kabiir o aan u sameynay xaflad yar oo dib uso noqosha iyo xil ku wareejin ah.

Waxaa halka kuso gaba gaboobay masuuliyadii aan waajibkedii u gutay sidii laigaga baahna aana ku simay oo aan si nabad ugu xil wareejiyay, waxaana halka igaga dhammaaday cutubkalo kamida nolosheyda, waxaan iguso wajahan dib u laabashadii dalkeygii hooyo ee soomaaliya.

Waxaan wacay Caaliya si aan ula wadaago arrintan safarka dib u laabashada markii aan cabbaar wada kaftannay ayaan ku dhahay arrin ayaan raba inaan ku sheego waxa ay igu tiri maxa diiday iisheeg he wanba sugi la ahaye, kaddib ayaan ku dhahay aniga oo hadalka la baqaya“soomaaliya ayaan dib ugu laaban rabaa”, ma aysan ila hadal oo wa ay ka naxday bixitaankeygan, waxaan ku dhahay “ila hadal shimbirteydi, maxaa kugu dhacay”, kaddib telefonka ayeey igu damisay wan wacay, ma aysan

iga qaban, markale ayaan ku celiyay waa ay iga qabatay waxa ayna igu tiri “wad iska bixi kartaa, ani kuma hortaagni” waxaan dareemay iney oynayso waxaan ku dhahay “Caaliya is daji, ani xitaa ma jecleyn ka fogaanshahada”, sidan iskugu dayayey inaan aamusiyo waxaanba arkay aniga billaabay, oohinta, marka ayeey igu tiri “bas shimbirkeygi illintadu wey idhibeysa ii aamus”, waxaan ku dhahay maku dhaha wax aad ku farxeyso, iisheeg ayeey igu tiri, waxaan dhahay “waxaan qorsheyey safarkeyga ka hor inaan wada aadno gobolka Agra”, waxa ay igu tiri “sabab?” anigu faallo kale u raacinin ayaa halmar ku dhahay “TAAJ MEHEL”, oow!! Wooow! Uuuumah! Waxa ay isku dartay qeylo iyo shumis ee telefonka iga shumisay, waxaan ku dhahay “telefonkaga haddan ahaan laha waxaas oo shumis ayaa nasiib u yeelan lahaa”, waxa ay dib u bilowday qosolkeedi iyo kaftankii, waxaana nasiib u yeeshay inaan dib uso celiyo farxadeedii.

Waxaan ku dhahay mar dhagahaga i amaahi, aan wax yar ku dhehe:

”Tirsimaad ma leh jacaylkuye, intuu duni taariikh dhigay.

Taaloyinkii loo suray iyo, taaj mehel ba ka qeyb aheyd.

Waa qasri taariikh lahoo, dunida tacliin baray.

Koli haddey tabari ii diidayo, inaan taallo kuu dhiso.

Walle tacadi bey igu noqon, haddan, haddan, haddaanan taaj mehel kula tagin.”

Waxa ay igu tiri “waa an ka gudoomay ereyadan macan, kisto jacburba haiska ahaadane ”, anima geerarkeyga cayne iyo qosol ayaanu habeenka ku kale seexanay. Bari danbana waa safarkii dalxiiska, gobolka Agra ee Taj mehel.

Safarkeenii TAJ MEHEL

Jaceylku waa naxariis iyo uur jileec farabadan oo aad u qaadeyso qofka aad jeceshahay.

Jacaylku waa cabsi, waa farxad, waa wehel, mar waa cabsi o waxaad ka baqeyso inaad weydo ruuxa aad jeceshahay, marna waa wehelo markuu dhinacaga fadhiyo waxaad dareemeysa inaad heshay qeybtii ka maqneyd ee noloshada dhameystiri laheyd, marna waa farxad, haa waa

farxad aadan jecleyn iney wala iiga ka lunto.

Marka aad wada fadhisaan meel aad u jawi daggan, oo ay garbihiina dhinacyada isku hayaan, oo jawiguna yahay mid idin kali ah, waxaad dareemeysa ammaan iyo dagganaan fara badan, waxaadba isleedahay dunido dhan miyaa idinku garab siineyso inuu jecelkiinu sii jiro.

Markii aan so galnay goobtan, wax waliba waa ay daganaayen oo wax buuq ama sawaxaan aan kan shimbiraha ka aheyn dhagahenu ma maqleyn, waa meel aad kuso jiidaneyso bilicdade iyo dhismeheedan cajiibka ah, waa guri ammaan ah, waa gurigii jacaylka.

Waxaan mar waliba ka arki jiray Tv-yada, waligeyna kuma aanan riyoon inaan goobtan mar un iman doono.

Kani waa albaabka weyn ee Taaj. Albaabka taaj mehel waxaa uu so dhaweynaya cidkasta o soo booqadato, cidina dib igaga noqo ma oranayo, waxaana ku qoran qoraal gacmeed aad u qurux badan oo oranayo: “O Soul, thou art at rest, Return to the lord at peace with him, and he at peace with you.”; “nafyahey, waxaad ku sugantahay goobtii daganaanta, u laabo rabiga ay nabad galyada

dhankiisa ahaatay, isaga haku amaansade e.”

Doogga iyo durdurka wabiga Yamuuna, ayaa indhahaga ku sii ridaya cajab iyo amakaak hor leh, alla ku wacnaan laheyda lamaano kasta iney halkan yimadaan, si ay u dareemaan in jacaylku xitaa uu u qalmo in daaro dhaadheer dartiis loo dhiso.

Daartii jacaylka ee taaj mahal Waa goob soo jiidasho badan,haddad mar timaadana waxa ay ka dhigta mid aan xiisaheda joojin kareyn, Dhismahan waxaa uu xambaarsan yahay, qiso jacayl oo dhab, marka aad maqashana kugu sii abuureysa xiiso kale o cusub, alla maxay nasiib badneyd xaaska Shaah jahaan, oo loogu yeeri jidhay Mumtaz mahal, waxa ay noqdeen labo ruux oo tusaalo u noqday jacaylka iyo calaamadan ay inoo reebeen oo ay maanta dunido idil uso wada daawasho tagayaan.

Cidna ma kareyso iney si dhameystiran uga sheekeyso, waxaa ay kuso aragtay gobolkan Agra ee taaj mehel, sababto ah indhahagu kamaba dhargayaan bilicda meesha taal.

Caaliya waxaa ay fadhisay dhinaceyga, xitaa inoma dhaxayn meel ay hawo so marta, mar ayeey waxaa ay iweydiisay, maxaad ku dhihi lahayd hadii aad maanta la kulmi laheyd Shaah jahaan?, aniga oo

gacanteda haya, fareheda ku cayaaraya ayaan ku dhahay “Caaliya mahal iney dhinaceyga fadhiso, oo ay mumtaz mahal kasii naxariis badantahay.”, sidan uwada qosleynay waxaanba arkay iyado iska ilmeyneysa, markasan ku dhahay “maxa kugu dhacay, farxad ayaanba ku jirnaye, maxaad u ilmeyneysa, shimbirteydi?” waxa ay igu jawaabtay “waxaan u baqaya farxadeena, ee ma ii ballan qaadeysa inadan wala iigaa iga fogaaneyn.”, waxaan ku dhahay “bas intaas lee miyad illintadan qimaha badan u qubaneysa, hadda waa ikan sidaad doonto iga yeelo, marwaliba adiga i leh.”, waxa ay igu tiri "waxaa i indha tirayba waa kalmadahaagan naxariista badan, ee ina keen aan dhib u laabanee.”

Waxaan si nabad iyo jacayl leh aan kaga soo laabannay gobolka Agra, e taaj mehel, oo nolosheena iyo jacaylkeenaba uu u noqday xasuus taariikhi ah, waxaana u sii diyaar garoobaya safarkii dib u laabashada ahaa ee aan ku laaban lahaa dalkeygii hooyo.

Waxaa markale murug igu noqotay, ka tagista halkan aan ku helay dad i jecel, ileen meeshad baratana waa ku baas, shalayna waxaa ii murug ahaa soo aadista meeshan, maantana waa ta an dhibsanayo ka tagisteeda.

Saakay waxaan jiidaya boorsoyinkeygii, waxaana kusii socda xaga diyaaradda, Kabiir, Caaliya, Caasha, Juliya iyo ashraf oo aha macalinkeygii cunta karinta ayaa si wada jira gacma is dhaf dhafaya igusii macsalameyna iyago aad ka dareemi karta ineysan macsalameys ka ahayn ee ay ka tahay, dib inoguso laabo.

Dib ugu noqoshadii Muqdisho

Waxaan soo caga dhigtay dhulkii udugga, ciideydii hooyo, waxaan dareemaya wadaniyad. waxaad daremeysa nusqaan, marka aad dalkaga hooyo ka tagto, sida ay ilmaha yariba u ilgo'o ama ay diifta kaga muuqato markay hooyadii ka maqantahay, isla sidaa waxaad dareemeysa sida uu canuga hooyadii ugu farxo mar ay suuqa kasoo laabato, adiga farxad ayaad daremeysa kolka aad dhulkagii hooyo kuso laabato.

Tagsigu waxaa uu ku socday xawaare dhexe, aniguba deg deg iguma usan jiran, ee waxaan ku raaxeysanayay, bilicda waddoyinka Muqdisho oo aan waayo mooga, aniga oo 8-bilo qura ka maqna

ayeey ila muuqata inaan sannada mooga, waxa ay inadhaheygu ku jeedan dhanka daaqada gaariga, oo waxaan macaansanaya dadkeyga oo aan muuqoda u xiisay, midabkoodan maarriinka ah ee aanba nuuciiso kale dunida laga helin, waa abaarihii kowdii iyo sideed iyo toban daqiiqo oo duhurnimo, waxaa dareemeysa kuleelka jira iyo sida uu qofkasta barafka usii wato, walow aan aniga aanan daremeyn oo uu mukeyfka gaariga si kumel tag ah inuu shidanyahay, waxaan darewalka ka codsaday inaanu Dukaan ku leexanno, si aanu cabitaanno qabow iyo shukulaatooyin ugu sii iibino caruurta iyo dadka guriga inoga horeeya, zakariye iyo sundus oo ah da'aadii iga yareyd iyo habo Leyla ayaa ila socdo oo elaboorka igasoo doonay.

Markii aanu soo iibinay cabitaanada iyo shukulaatoyinkii ayaanu gaariga kuso noqonay, dareewalka ayaan mooday inuu harraad daran hayey, markii uu cabitankii aan u dhibay qac kasiiyay ayuu sheeko inoo billaabay, oo aan niyada iska iri "talow ma harraad buu la aamusna."

Markii aanu nimid guriga ayaa dadkiyo idil wajiyo farxad leh iguso wada dhaweyen, wax walbo waa sidoodii, hooyo waa sidii ismey badalin oo waxa ay ileedahay, haye saqajaankii ayaa yimid oo nanacay

(saqajaan waa hadal hooyo halheys u ahaa oo ay markasta igu kajimi jirtay marna igu caayi jirtay), indheheeda ayaad ka daremeysa farxada ka muuqato oo ay ku faraxsantahay dib uso noqoshadeyda, haddane waxa ay iila hadlaysa qof ana ii xiisino kale, sababto ah waxa ay idareen siineysa inuu maqnasheheyga murug ku hayey o ay ii xanaaqsantahay, hab ayaan siiyay oo waxaan ku dhahay “hooyo, sidaad doonto xanaaq igu muuji, laakiin jacaylka aad ii qabto indhahaga ayaa ka aqrisanaya”, waxa ay igu tiri “mudadaas dheer ayaad iska maqneyd haddana sidaan fudud miyaad igu sasabatay”, halkii ayaan kaftan iyo sheeko ka bilawnay oo ay su’aalo badan iga weydiinayen, waxaan ku soo arkay hindiya iyo dhaqamadooda sidey yihiin.

Imaansheheyga midna ma ogeyn asxaabteyda, waxaan rabay inaan aragtideyda lama filaan uga dhigo, maalinkii xigay oo aan si fiican uso nastay ayaan soo aaday guriga Maahir, markii aan so gargaraacay ayaa waxaa iga furay Maahir hooyadiis, wey itaqaanay, waa ay isalaantay waxa ay iweydiisay goortan imid, waxa ay igu tiri “sii fariiso hooyo, maahir waa u imanayaahe”, wan iska fariistay oo telefonkeyga ayaan geem isaga ciyaarayey albaabka guriga ayaa laso garaacay,

maahir hooyadii jikada ayeey ku jirtay waxaan kudhahay “mama aniga soo furaya irida”, markii aan furay irida. ooww, waawareey, indheheyga miyaa, iiwaran saaxiib, aah wad nagu kadisay saaxiib!!. Maahir ma aha waxaa soo garacayey ee waa Qaalid iyo Feysal, qolka fadhiga ayaanu soo wada galnay, halkii ayaanu ka bilownay kaftankeennii iyo isku camirashadeynii, Maahir hooyadii ayaa cabitaan qabow noo keentay, sidan u wada qosleynay ayaa Maahiro ordaayo qolka noguso galay, halkii ayaan isku boodnay oo isku mar xabeynay, waxaan dib u galnay xasuustii 8 bilood ka hor, jaamacaddii iyo wixii iga danbeyey. Waxa ay aheyd maalin qurux badan oo aanu dib u midownay saaxiibeyda oo ii ah qoyskeyga labaad.

Waxa ay igu qasbeen inaan jaamacadda dib uguso noqdo isla barri, xitaa aan asbuucan inaan safarka ka nasta waa ay iga diideen, oo waxa ay u xiiso qabaan inaan subaxkasta gaariga wada raacno inago, wada qosleyna, kana soo dagno inaanu isku camiraneyna, noloshena hore ayaa iska sida aheyd oo mana jecleyn iney cidkale inaso dhex gasho, xitaa waqtiga imtixanka guriga Maahir ayaanu wada seexan jirnay.

Subaxdii xigtay, waxaan billaabay inaan is diyaariyo,

intii aan musqusha ku jiray ayaa waxaa laigu yiri badanka ayaa lagu taaganyahay, markiiba wan iso soo boobsiyay, waanu isa soo wada raacnay oo waxaan soo aadnay jaamacadda, markii aan nimid ayaan waxaan si toos u aaday xafiiska maamulka si aan dib isugu cusboneysiyo oo aan u sheego, wixi i qabsaday iyo waxaan jaamacadda uga maqna, markii aan arrintii u sheegay ayeey igu yiraahden, maxaad jaamacadda u xeran weysay intada bixin ka hor?, si walban u dooday oo marmarsiyoyin u sameystay, waxa ay kuso dhamatay natiijo la'aan, maalmo badan ayaan xafiisyada jaamacadda ka daba wareegayey laakiin, wadada kaliya ee ii banaan ee iisheegen ayaa noqotay iney ii awoodan kaliya iney arday cusub ahaan ii diiwaan galiya ama aan jaamacadda isaga tago.

Arrinta ayaa niyad jab badan igu abuurtay, inaan jaamacadda dib uso billaabo, ma aanan quusan oo waxaan isku dayay inaan jaamacado kale dhibkeyga u bandhigto iyaguna waxa ay igu xujeeyen inaan la imado, warqada dhibcaha imtixanka (marksheet), waxaana ogaaday iney ii furneyn jaanis aan ahayn inaan arday cusub noqdo, halkii ayaan ku go'aansaday inaan isaga tago jaamacadda oo idil oo aan shaqeysto.

Mararka qaar qofku waxaa uu qaata go’aan kaa soo qar ka tuuri kara noloshiisa, ama u horseedi kara hormar iyo badhaadhe.

Waxaan billaabay fikir iyo maxaan qabta, halke shaqo ka hela, maxaan ka shaqeya?

Waxaan dhinacyadeyda fadhiya saaxiibadeydo oo ii ah qoyskeyga labaad, cidna kuma faraxsano go’aanka aan qaatay, labadeyda qoysba waa ay igaso horjeeda, markii danbe oo ay arkeen inaana dib u laabasho laheyn ayeey isku dayeen iney wax uun ii raad raadiyan, laakiin natiijo daro ayeey kuso dhamaatay, meelo badan ayaan shaqo u doontay, laakiin meelkasta waji iyo qabiil ayaa laigu xujeeyay, “Cakuye qabyaalladu kama ilbaxno miyaa!.”

Shaqo idil wan waayey, maalmo kaddib ayaa Maahir aabihii ingiriiska ka imaaday, oo uu u yimid arrimo guur oo Maahir walashiis ka weyn ayaa la guursanayey, waxaan qeyb libaax leh ka qaatay, qaban qaabada arooska iyo howlihiisa, sidii wiil guriga ka dhashay ayaan howl walbo isla qabaneynay aniga iyo Maahir.

Arooskii kaddib ayaa Maahir aabihii ka wareysatay arrimaheyga iyo waxaa aan qabto waxa uuna u sheegay ina bilaa camal ahay.

Maahir aabihii waxaa uu iiso qoray warqad o uu iigu soo dhiibay Maahir, warqadda waxaa ku qorna ciwaan ama tilmaam huteel iyo saxiix iyo magac, wan farxay oo waxaan ku sheekeysanayey inaan huteel shaqo ka helay, oo habeenkii oo dhan waxaan isweydiinayey, maxa ka noqon doonta, maamula, xisaabiya, cunto kariya, waxaan isku qanciyay inaan intan mid noqon doono, haddii aan waayo maamulanimada ama xisaabiyaha inaan u sharxi doono, sidan qatar ugu ahay cunto karinta.

Subaxan waa subax shaqo doon, waxaan guda galay isdiyaarrin, quraacdaba mar hora miiska laigu sii diyaariyay, wax yar ayaan ka cunay oo waxaan islaha ballanta haka daahin, subaxa aad ban u labistay, xitaa waxaan iska buuxiyay barafun kii ay iso hadiyeysay gacalisadeydii, waan soo cararay, o waxaan so raacay gaari B.L ah,waxaan imika soo gaaray huteelkii. markii aan soo galay, aniga ooba la ii mooddo wiilka milkiilaha huteelka sidan u labisnahay un. mid shaqaalaha kamida ayaan weydiiyay “aaway xafiiska maamulka?”, waa uu ii tilmaamay, kolkaan xafiiska so galay, ayaan salaamay maamulaha, salaan diiran kaddib waxaan jeebka kaso bixiyay warqadii laiso qoray, oo aan u dhiibay, marku aqristay ayuu iso eegay, hadane warqadii dib u eegay, kaddib ayuu igu yiri “waa uu

ilasoo hadlay, booska naga banaan qofkii buuxin lahaa waa u diyaarsanaa, laakiin qofka aad kasocoto ayaa aad inogu weyn sida darteed ayaan shaqada kugu siinay, waxaana banaan booska KABALYEERIGA (Waiter)", aad ban uga naxay, waxaa aan filaayay iyo waxaa aan kala kulmay, waxaan sugayey su'aalo badan in laiweydiiyo ama waxaa aan xirfada u leeyahay, waxaa uuna iisoo dhiibay foom oo u igu yiri "soo buuxi haddad shaqadan diyaar u tahay, isla barrina waa inaad soo shaqo gashaa." halkaas ayuuba war iigusoo koobay .

Niyad jab hor leh ayaa igu dhashay oo waxaan filanayay iyo waxaa igusoo baxay ayaa kale duwan, laakiin wax waddo ah o kale aan taas aheyn ima aysan furneyn, waxaana go'aansaday inaan ka shaqeyo, shaqo kasto iga hor timado, waxaana buuxiyay foomkii aan ku shaqa gali lahaa, halka ayaana ka shaqo billaabay.

Kabalyeeri

Dhoolacadeynta wajigeyga ka muuqata ma ahan midey farxaddu sababtay, ee waxaan la dholacadeyna waayuhu siduu iga hiilanayo, shalay wuxuu iga dhigay maamule, maanta kabalyeri.

waxaan xiranahay shaati cad iyo surwaal madow, dhaxduna waa ay ii dhuuqsantahay, dhirirkeyga iyo labiskan ayaa isteylkeya soo saaraya iyo timaheygan tunka daadsan, dadka qaar markaan dalabka u geeyo iyago isii eegaya ayeey mahadsanid igu yiraahdan, waxaad ba isleeyahay marmarka qaar qaabkeyga miyaa xun mise mulkiilaha meesha ayaan u ekahay sidey dadku ii eegayaan darteed.

Muddo kaddib.

waxaan isfahannay dhammaan shaqaalaha huteelka iyo maamulkiiba. hadda waxaan ahay ninka seddexaad ee ugu mushaarka roon shaqaalaha, waxaan shaqeynaya muddo dhan kow iyo toban bilood, waxaan qabta labo shaqo, waxaan ahay madaxa cunta karinta iyo kabalyeeri, waxaan so maray marxalado adag oo mararka qaar igu qasbayay inaan ku fakaro inaan gabi ahaanba shaqada isaga tago, sida niyad dilka ah ee ila

dhaqmayaan dhammaan shaqaalaha iyo maamulkuba, mushaar yari iyo cadaadiska faraha badan ee isaarna. Anigu ma aanan quusan oo waxaan laimid adkeysi iyo dulqaad farabadan, laakiin xaaladu maanta waa ay ka duwantahay tii hore, cid walba wey iqadarrineysa xitaa maamulka waxaan tusay kartideyda, waxaan baray waxaa uu yahay dulqaadka iyo is cafinta.

Hadda waxaa isoo wacaya Caaliya, ballankii aan dhiganay waxaa uu aha, kaliya inaan maalinta fasaxa ee asbuuca inaan waqti wada qaadanno (maalinta jimcaha) oo aan isa soo wacno, maantana waa Arbaco, waxaan is iri “ar amuu dhib qabsaday”, waan ka qabtay.

kaddib ayeey igu tiri si dagan “shimbirkeygi.”

, “haa shimbirteydi, maanta wad so dheeratay” ayan iri.

“aah shimbirkeygi, xadkan dhib ayaan ku qaba ma ogtahay, waxaan jeclahay inaan markasta maqlo codka macaan ee Axmadkeyga” ayey tiri.

“ooffoo, Caaliya waad ogtahay inaan shaqo ku jiro, adigana aad waxbarasho ku mashquulsantahay, marka xadka aan dhiganay ayaan nafteena ku

xakameyn karna, haddii kale, shaqada ayaa la iigaso burina, adigana waxaad ku dheceysa imtixaanka”

“shimbirkeyga arrin muhiim ah ayaan kuuso wacay”

“iisheeg gacaliso, wax dhiba miyaa kula soo gudboonaaday”

“een bishan haddey dhamaato, waxaan kuso wajahanay Neyroobi” ayey igu tiri.

“oo ma waxaad ka wada masterkii ayaa ii dhamaaday?.”

“haa qaali”

“aah, sidan miya lama filan laisaga dhiga, okay anigana lama filan ayaan kuu haya, caawa ayana kuu sheegayaa.”

“hadda iisheeg nohh qaali.”

“maya gacaliso, hadda bulsha ayaan ku dhex jiraa ee waa inoo caawa.”

“ballan iga qaad inad caawa iisheegeysid”

“waa ballan qaali”ayan ku dhahay.

Waxaan sugi la’aa inta caawa tobanka fiidnimo laga

gaarayo, waxaan sugaba imika saacadu waxa ay isku taagtay sagaalkii iyo barkii fiidnimo, waxaan billaabay inan qubeysto oo aan qolkeyga si qurux badan, u hagaagsado, waxaan furtay daaqada si jawiga an kula hadlayo uu u noqdo, mid aan wax carqalada ah lahayn.

waqtigan waa waqtiga ugu fiican ay lamaanuhu u sheekeysan karan sidey doonan, malahan wax buuq ah, dadko idil waa ay hurdaan, jawigu waa mid aad u macaan oo leyrtu dhanka iyo dhanka ku dhaafi, waxaadba isleedahay waa waqti lammaanaha u gaar ah.

Waxaa bilownay wada hadalkeenii, kaftankeenii iyo wada qosolkeeni, waxaanba arkayba iyado aan ka hadlin dantii ku qotantay wicitanka, oo aanu laba saac ka badan wada hadleyno, waxaan ku dhahay “macaantadeydi, telefonku dab la’aan ayuu sheegaya, anigana sido kale”, markaan sidaas leeyahay, dhagta ayaan ba ka kabaabiyooday, markasay ku qeylisay “ballantii mad iga baxday, waxba maba aadan iisheegine”, waxaan ku dhahay “afkeyga ma awoodo inaan so mariyo, ee siden kugu sheega?”, waxa ay igu tiri “macaankeygi, dhagaheygu markasta waxa ay diyaar u yihiin, iney adiga un ku maqlan”, waxaan ku dhahay “waxaadba

jacaylka aan ku qaba xadka kasiibixinayo kalmadahan macaan ee aad igu leedahay, haddii aan ku waayo waxaanba ka baqaya inaan kugu waasho", waxaan ku dhahay "uhh! een, een! shimbirtedi wad ogtahay, si xad dhaaf ah ayaan kuu jeclahay, waliba si waali ah,bal ka waran jacaylkeena haddan guur u badalno?", waxaan sameecada telefonka ka dareemayey neef turkeeda, waxa ay igu tiri "eee…een..aniga..ee..laakiin, walaahi ma aqaanno waxaan ku dhoho, ani dhan ma aqaanno sidan ahay", waxaan ku dhahay "wan dareemi kara inaan kadis kaaga dhigay, in muddo ah ayaan qalbigeyga ku heystay, laakiin intan ka badan wan qarsan waayey", waxa ay igu tiri "Caawa jawigeyga oo dhan halmaru isbadalay, ma naxsanahay, ma faraxsanahay, wan kala garan la'ahay siduu jawigeygu yahay, laakiin dhab ahaanti riyadeyda ugu weyn ayeeba ahayd guurkaaga, iyo sida fudud ey hoosta iga soo gashay ayaanba rumeysan la'ahay", waxaan ku dhahay "hadda kaddib riyooyinkaga oo dhan, waa kuweyga, waxaanu yeelan hal riyo aniga iyo adiga", waxaan dareemay fiqfiqda oohinta ay isku celineyso, dabeecada kaliya aan kala yaabay ayaa ah, ineysan adkeysan karrin farxad yar ama murug yar oo ay iska ilmeyneyso, beer jileec miyan dhaha, waxaan

ku dhahay “alla shimbirteyda beer jilcana, intas yar miyaad la oyneysa”, waxa ay igu tiri “maxaan u oyn waayey, riyadeyda dhan oo aan muddo ku taamayay ayaa hadda ii muuqato e, iney run isu badali rabto”, waxaan ku dhahay “ani habeenka arooska baranbara jeebka kuso qaadana, haddad oyso, wan kugu dira ogow hadaba”, halkii ayaanu qosol iyo kaftan markale ka bilaaway oo wacadka inaan ku dhabeyno ayaan ku kale seexannay.

Bil kaddib

Dhagaheygu waxa ay maqlayaan, dhawaqa mashiinka wadnaha, waxaan dareemaya jirka oo dhan inuu idanqanayo, waxaan kalo dareemaya madaxa faashada iiga duuban.

Indhaha ayaan so kala qaaday, waxaan jiifa sariirta bukaanka ee isbitaalka, waxaa jirkeyga ku socda faleenboyin, waxaa dhinacyadeyda fadhiyo hooyo, habo iyo abaayo. Waxa ay iweydiinayan sida uu xaalkeygu yahay, laakiin hadalkuba inuu dhuunteyda so dhaafo marabo, ciilka iyo carada dhuuntu ila go’antahay awgeed. waxaan isku dayey inaan fariisto, laakiin xanuunka ihayo ayaa iidiidan.

Aan maskaxdeyda dib u celiyo

Caaliya markii ay neyroobi timid ayeey aabbeheed,

la wadaagtay arrinteena iyo xiriirka inaga dhexeeyey. aabbehed waxaa uu ka codsaday iney lamberkeyga siiso, si uu u axwaal wareysto ninka inantiisa rabo inuu mustaqbal la wadaago.

Maalinta aadban u mashquulsana oo waxaan diyaarrineynay, cunto loogu talagalay xaflad casuumad oo huteelka ka dhaceysay.

Waxaan gariir ka dareemay telefonkeyga oo jeebka hoose surwaalka iigu jiray, waan soo bixiyay oo waxaa iso wacaya lambar kiinya ah, durbadiiba wan dareemay inuu Caaliya aabbehed yahay, oo horay ayeey igu sheegtay inuu iso wici doono aabbeheed, shaqaalaha ila shaqeynayey ayaan ku dhahay “howsha sii wada, qof muhiim ii ah ayaan la hadli raba e.” waxaan so aaday dabaqa labaad si balkoonkisa aan u fariisto oo ay dadku i arag sidan uga xishoonayo sodogeyga.

Wan ka qabtay oo waxaan billaawnay, salaan iyo iswareysi ku saabsan inaan gabadhiisa xiriir inaga dhexeeyo, su’aalo dhowr ah kaddib ayuu iweydiiyay su’aashan oo hankeygii dishay, riyadeydii burburisay, muraalkeygiina dilaacisay oo ah sida tan “Adeer maxaad camalo qabata”, waxaan ku dhahay “adeer waxaan ahay kabalyeeri ku kalsoon kartidiis”, wuxu igu yiri “adeer rag baad tahay, oo

shaqeyso, laakiin iga raalli noqo gabadheyda kuma aaminikaro nin iska maskiin ah, waxaan raba iney ku noolaato, nolol heer sara ah, marka iska ilow gabadhan mardhawna guurkeda ayaan diyaarrin rabaa.”

hadalkiisa ayaa walaac farabadan igu abuuray, oo xitaa jaanis aan kula sii hadlo ma usan isiin.

Waxaan dareemay wadno garaac saaid ah, wareer fara badan iyo inuu dulkuba iila muuqday inuu ila wareeganayo, aduunyadii ayaa igusoo yaraatay, waxaan ba dareemaya in maskaxdeydu ay xadka ka baxday oo isku dhax yaacday, ma waalatay mise wali waxba igu danbeya ma kale garan karo, waxaan dareemaya lalabo, oo wax kasta labo ayeey ila muuqdan. wareerka ihayo dartii, waxaan talaabo usoo qaaday dhanka jarjarada si aan caawimad uga helo dad hoos jooga, markii aan jaranjarta cagta soo saaray ayaan matag afka furtay, waxaaba igu war danbeysay aniga oo jaranjarada kasii faninayo, iminkana waxaan jiifa sariirta isbitaalka oo madaxa gees ba i tolan, jilbuhuna waa ay I fiiqfiqan yihiin, waxaas oo dhan waxaa iga sii xanuun badan, dhaawaca qalbigeyga ku yaallo.

Labo maalin ayaan isbitaalka ku jiray, kaddib ayaa guriga laiqaaday, maamulkana waxaa uu isiiyay hal

asbuuc oo nasiino ah, inkasto usan ogeyn dhawaacan waxa sababay iyo boogta qalbigeyga ku taallo.

Waxa ay ii ahayd asbuucii ugu xumaa o nolosheyda soo maro, marwaliba waxaan si quus la'aan ah u wacayay lambarka Caaliya, oo dansana. saacadkasta waxa aan rajo ka qabay in ay shidi doonto, xitaa waan wacay lambarka aabbeheed isagana waa uu dansanaa.

Shan maalmood kaddib waxaa ii dhacay lambarka Caaliya, wan farxay oo falaaro aan arkayo ayaa iga fuqay, waxaa uu dhacaba, waxaa iga qabtay ruux dumar ah su'aashi ugu horeysan waydiiyay waxa ay eheed "aaway Caaliya, sidey tahayna?", waxa ay igu jawaabtay "waa ay nabad qabta o arooskeeda ayaa shalay dhacay, la ……", hadalkale ayey sii sheegeysay laakiin halka ayaaba hadalkeedu igu war danbeysay.

Alla ciil badana, ilinteyda iyo dhididkeyguba si isku mida ayeey dharkeyga u rusheynayaan, waxaan ku fakaray inaanba nafto idil is dhaafiyo, ma sun ban cabaa, mise xarig ayaan isku ceejiya maya..maya ee bareeska kororntada yaan fara gashta.

Markii danbe aniga oo dhan waa an shoogay oo

hadal iyo dhaqaaqba waa laiga waayay, waxaa la'ii duray cirbado badan oo hurdo iyo kuwa xanuun baabi'in isugu jira.

Markii danbe ayaan so roonaday, waxaan billaabay quus iyo inaan ka niyad jabo jaceylkii aan u qabay oo aan ka aamin baxay, waxaan nafteyda u sheegay inaan awoodi kareyn inaan calafka celiyo, oo caanuhuna aan naaskii laga lisay lagu celin karrin, illintuna isheedii ku noqon karrin, sida darteed wax walibana ay qadar ku dheceen oo aanan aniga iyo ayadaba midna aan qalad ku laheyn.

Laakiin qalbigeygu waan ku kari waayey, ka sabrida qoftu jecla, ka sabrida naxariistu uga bartay, ka sabrida wehelkii uu dugsan jiray, hal heyskeyguna waxaa uu noqday ereyada tan:

Cakuye noloshu gaabanaa.

Kolkaad garabkagiyo.

Ka weydo geenyadaad jecleyd.

Qalbigaaguna uu gabeyn.

Inuu goobo yiraa. .

Gacalkeygu go'i maayo.

Ku meeyay geenyadeydiye.

Geed keed ku dhuumatay.

Aan ku soo gooba e.

Maalmo kaddib waxaan dib ugu soo laabtay shaqadeydii aniga oo wali laiga dareemayo muraal dilaaca. aaway wiilkii farxada badna, aaway wiilkii dulqaadka badna, aaway wiilkii dholacadeyn jiray markii la xumeyo, wax waliba waa ay isbadaleen.

Waxaan subax walba uso kalihi jiray shaqadeyda, oo marba marka ka danbeysa ay xaaladeydu isa soo tareysay, oo aan caadigeygii hore kuso laabanayey, laakiin waxaan necbeystay xiriir jacayl iyo wixii sheegaba, oo dumarka oo dhan ayaan iska ilaalin jiray inaan wax naxariis dheer ah inaan u sameeyo, oo gabdhaha qaar ayaa igu tilmaami jiray inaan ahay, ruux aan asxaan iyo naxariis midna aanan aqoon.

Waayuhu wuxu is rog rogaba, hadda waxaan ahay mid qoyskiisa la nool oo farxadna kula nool, laakiin markey iguso qaadan arrimo guur ayaan ka carooda, hadda waxaa laba jirsaday mudada aan huteelka ka shaqeynayo. Barrina waxaa ino jirto

xafladdii sanadlaha ee shaqaalaha lagu abaal marin jiray.

Subaxaan aad ayaan uso labistay, waxaana meesha isugu imaatay marti sharaf, aad u badan oo xaflada lagu casuumay, qudbado badan ayaa la jeediyay oo dhirigalin ah, waxaa laso gaaray, abaalmarinta saddexda shaqale ee ugu howsha badnaa sanadkii idlaaday, waxaa masraxa laga wacay seddexda qof oo u magaceygu ka mid ka yahay, laakiin qiyaali ayeey ila noqotay oo inta yara qoslay ba waxaan is iri “waa dhagahada ee adiga ma ahaa”, markale ayaa lagu celiyay magaceyga oo waxaa la raaciyay “hadduu ina maqlay, fadlan masraxa ha yimaado”, waa waxaan rumeysan waayey oo kadis igu noqotay, inaan noqday shaqaalaha ugu wanaagsan sanadka oo aan kowga ugu soo baxay, halkii ayaa sacab gees ka gees isqabsaday.

Maalinta waxaa si rasmi ah uso noqday farxaddii iga luntay qeyb kamida, waxaana maalinta oo dhan qofkasta igu hambalyeyneysay guusha aan ku tilaabsaday.

cid waliba waa ay kula qosleysa marka aad guul gaadho, laakiin cidna kula oyi meyso markey dhibtu ku asiibto, kaliya waxaa ay kuu sheegayaan iney ka xun yihiin waxaa kuso gaaray.

Maalinkasta waxaan si daacadnimo leh u gudanayay shaqadeyda, laakiin maalin kasta waxaan ku taami jiray oo niyadeyda gubi jiray su'aashan : Goorme ayaad shaqaalanimadan ka baxaysa, oo aad riyadada rumeyneysa?. Waxaan leeyahay riyooyin iyo himiloyin sare waxaana bilkasta wax ku dara keydkeyga si aan riyooyinkeyga u rumeyo, waxaan ku hamiyi jiray inaan noqdo hantiile, samafale iyo inaan heer saro ka gaaro ganacsiga maqayadaha iyo huteelada.

Waqti barqa ah oo ay ku beegneyd afartii iyo qadar labo iyo toban daqiiqo ah, ayaa waxaa huteelka yimid, gabar joog iyo jamaal ba leh oo midabkeedu maarriin caddaan xigeen ah yahay, waxa ayna xirneyd cabaayad ku yara giijisan, korna waxaa ay ka xirneyd turaaxad (marada yare madaxa lagu daboosho), waa ay fariisatay oo wajigeda waxaa ka muuqday murugo, cidkasta oo kaso hor baxdana waa ay dareemi kartay. anigu waxaan saarna dabaqa labaad balkoonkiisa , waxaa u yimid midka mid ah shaqaalehena, waxaa uweydiiyay dalab hadii ay u baahantahay, laakiin waa ay ka diiday sidan arkayaba.

Maalintii xigtay isla waqtigii agihiisa ayeey timid gabadhii, isla sidii camalna wax dalab ah meysan

dalban, waana ay fakarsaneyd, sidaan u eegayay ayaa waxaa muran ka bilowday maskaxdeyda iyo qalbigeyga, waa yaab, qalbigeyga waxaa uu igu cadaadinaya inaan caawiyo gabadhatan ee dhiban, halka maskaxdeydu ey kaso horjeedo fikrada qalbigu keenay.

Qalbiga ayaa ileh “waa gabar maskiina oo dhibban, wax garab ahna ma heysato ee garabkeeda istaag”, maskaxduna waxa ay igu leedahay “war gabar miyaa asxaan leh, Caaliya dhibkii kaa soo gaaray miyad ilowday, xitaa iney kuso wacdo guurkeda kaddib way iskala weyn tahay”, maskaxda ayaa i leh “kawarran haddii ay walaasha heerkan maanta taagnan laheyd, sidan miyaad uga tagi laheyd, maanta ayeey u baahantay garab, xitaa bani aadamnimada miyad kaga tageysa dhib yaro lagu geestay”, maskaxda ayaa heysan wax qiil kale ay kusii doodo waxa ay igu tiri “nasiib wacan.”

Waxaan billaabay inaan is dhiiriyo, waxaan u keenay, koob kafeyga madow ah, markii aan so ag dhigay ayey igu tiri “anigu waxba kaama dalban”, waxaan ku dhahay “haa wan ogahay, laakiin qofka murugeysan waxaa u fiican kafeyga madow si uu madaxa ugu dago’, waxa ay igu jawaabtay “murugadeydu ma aha mid adiga ku quseyso”,

waan isaga tagay, waxaan niyada iska iri “waa qof careysan, ee hauqan isaga sabar”, mararka qaar waxaan arka iyado iska oyneysa.

Dhowr maalino kale ayeey u imaneysay si is xig xigta, oo aan maalinkasta u geyn jiray kafey ama cabitan qabow, oo aan aniga isku qori jiray, si looga jaro mushaarkeyga.

Maalintii xigtay ayaan meelaha ka eeg eegay oo meysan imaan, markalena dib uma arag.

Muddo labo asbuuc kaddib ayeey dib uso laabatay, iyado aad ka daremeyso, daganaan iyo ineysan wax muruga heyn, maalinta waxaan isku dayay inaan dalab kasoo qaado maadaama ay ka jawi duwantahay maalmihii hore, markii aan utagay ayaan si waji furnaan leh ku dhahay “marwo soo dhawaaw, maxaa dalabo ku keena”, waxa ay igu tiri “adigoo iweydiin dalabkeyga ayaad mid adiga ii dooqday, haddana isla isaga mad ii keentid”, markii aan u keenay ayeey boorsadeda kaso bixisay lacag dhan $100 dollar, waxa ayna igu tiri “abaalkaga intan ma ahayn, mana gudi karo laakiin intaan iga hoo”, waxaan ku dhahay “maanta wad faraxsantahay, oo asxaankii yara aan kuu galay miyad lacag igu badaleysa, oo inaan garabkaga istaago waa waajib bini aadamnimo o isaarna, wax

lacag ahna kuma doorsan karo", waxa ay igu tiri "maalinkasto waxaad ii gali jirtay abaal, aniga oo aflagado kugu badali jiray, qof xun ban ahay, xitaa wan ka xishoonaya inaan cafis ku weydiisto", waxaan ku dhahay "kuma weydiinayo dhibka ku heystay, oo marabo inaan xanuunkaga dib u faago, laakiin farxada ayaa ah dhadhanka nolosha, adigu waxaan kugu hambalyeynaya inaad ka gudubtay marxaladdii xumeyd." Waan isaga tagay, oo shaqo badan ayaa isugeysay.

Maalinkasta waa ay iman jirtay oo waliba waxaa ay jecleyd inaan dalabka u keeno, si ay wax yar iila kaftanto, anigu waxaan difaac adag kaga jiray in arrimo xiriir ina dhex maraan, waxaan markasta usoo koobi jiray hadalka, mararka qaarna qofkale ayaan dalabka ugu dhiibi jiray.

Waxaanba iminka leeyahay, maskaxdeydu waa ay saxneyd oo qalbigu waxaa uu ii wado waa hog , sababto ah waxaa uu igu leeyahay "maxaad isaga fogeyneysa gabadhan, oo hadalkaga u ooman, dartadana u timado huteelkan maalinkasta, hadalkaga ayaa u farxad ah, ee la hadal."

Maalinkii danbe ayey igu tiri "wax walbo igu dhacay oo sirteyda ah inaan ku sheego ayaan jecleystay", waxaan ku dhahay "wad iisheegi karta", waxa

niyada iska iri “laakiin sidaan oo dhan maxay igu aamineysa”, marka ayey ii billowday qisadeeda:.

“Waan xasuusta, waxa ay ahayd: subax roobaad, samadu furantahay, roobna soo di’i, seymaha roobkiyo, udgoon u sii dheeryahay, kolkaad sankiyo, la raacdo saxan saxada roobka, aad si looniyo farxad siyaado ah ka sii qaadi.

Kolkii aan baska ka dagtay, oo aan ku sii socday goobta shaqada, oo marka aan subax kasta u lugeyn jiray wax dhan 6 daqiiqo, markii aan ilbiriqsiyo is moognahay baskii aan ka dagay, ayaa waxaa sankeyga buuxiyay uduga dabesha saxan saxada roobka, durbadiiba waxaan maqlay guuxa roobka oo si xowli ah kuso socda, waliba midka dhibca weynaha ah.

Waxaan isku laabay har yar oo goob ganacsi horteeda ah, aniga oo isleh marku qayooda horay u carar, laakiin muddo rubic saac ah ayuu si is daba joog ah u socda, oo wax kale joogsi ah malahan, xitaa dharka aan sitay waa uu iga qoyay.

Markii aan adkeysan waayey, oo dabeeshuna ay dhibcaha roobka darbiyada ku garaaceyso, ayaan go’aansaday inaan tagsi qabsado si aan shaqada u tago aniga oo bad qaba.

Dhowr tagsi ayaan u gacan haatiyay, laakiin wax ii joogsado wan waayey, aniga oo kasii gacan daba taagaya tagsi isii dhaafaya, ayaa waxaa soo kale fireeyay gaari aad u qurux badan, waxaan is iri “ naa adi kuuma socde hanqaltaaga iska daaye, tagsigada iska waco”, laakiin xaqiiqdi dhankeyga ayuu u soo socda, markii uu ilaso simay gaariga ayuu mirayada hoos u dajiyay, waa wiil soomaali ah. hadal buu igu yiri, laakiin si fiican uma maqal roobka socda awgii, laakiin waxaan dareemay inuu I leeyahay, gaariga soo kor.

Xilli ay gabari is macneysa lama taagneyn, oo ilahow wax uun i caawiya ii sahal ayeey iga taagneyd, oo meesha kaa wada qoyaanka iyo qarqaryada I heysa awgeed.

Markii aan gaariga soo galay ayuu iisoo taagay maro yar, si aan isaga tirtiro qoyaanka iga da’aya, waxaa uu iga damiyay AC-ga gaariga, waxaa uuna ii shiday, hot-ka si ay qar qaryada ii deyso, oo aan diirimad uga helo.

Wan eegay, kolkasan ku dhahay “mahadsanid walaal”, markasu igu yiri “waajibka walaaltinimo mahadcelin maleh?”, waxaan ku hadlo ayaan garan waayey, waxaanba la yaabay xushmada iyo naxariista ka buuxda wiilkan, alla nasiib badana

gabadhii hesha, aniga oo maahsan oo niyadda ka sheekeysanayo ayuu igu yiri “dhankeen u dhaqaaqna?”, waxaan laso booday, “ow sorry!, NationalBank (NBAD). ayaa rabay ma isii geyn karta ”, waxaan 3-daqiiqo dhameynba markaan soconnay, ayaan waxaan ka warhelay isago ileh “walaalo, waanu nimid goobtii aad iisheegtay”, waxaan iri “ow, haa, waa halkan”, waxaan gaariga ka dagay aniga oo niyadda kasii guuxaya o leh “alla wadadu maxay intan uga sii dheeran weyday”, waxaan macsalameyay aniga oo sii eegaya oo hoos kasii leh, “talow, dib danbe ma u arki doonta.”

Maalinta oo dhan wan iska faraxsana, oo qofkasta markaan iraahdo “Sabaaxal wardi”, waxaa uu i oranayey, “xalay miyaad dhinac fiican u seexatay”, sababta ay sida ii oranayan ayaa ah, iney igu yaqiinen aamusnan badan iyo daganan.

Maantana waa maalintii ugu danbeysay shaqada, barrina waxaa inoo billaabanaya fasax, aniga iyo qoyska yagana waxaa inoo diyaarsan safar dalxiis ah, ee gobolka shaariqa (sharjah).

Subaxdii xigtay.

Waxaan beerka u jiifay sariirteyda, waxaan xasuus qorkeyga ku qorayey dhacdadi shalay, ee uu roobku

sababta u ahaa. Waxaa banaanka ka maqlay hoon gaari, oo ka duwan, gaariyasha ay leeyihiin dadka guriga wax ka dagan, balkoonka ayaan soo istaagay, waa wiilkii shalay. Laakiin siduu ku helay adreeska gurigeyga, ileen anigaba umana sheegin, waan soo orday oo deg deg ayaan jaranjarada uga soo dagay, aniga oo isleh yeysan familku kugu arkin adigo wiil la taagan, hadana la joogiisa inaan jecleysanayo ayaad moodda.

Markii aan u imid ayuu i eegay, waa uu igu qoslay, wan garan waayey sababta uu igu qoslay, kaddib ayuu isoo taagay boorsadeydii yareed, e aan uga so dhex tagay gaarigiisa, xitaa ma ana tabin iney iga maqneyd, isago wali dhoolacadeynaya ayuu sii dhaqaaqay, “see you soon, bye” ayuu igu yiri.

Kolkuu iga tagay, ayaan is iri “waaba yaabbe, muxuu kugu qoslaya?”, aniga dib isugu noqday wan is eegay, waxaan dhar ahaan u xiranahay, daba gaabkii aan guriga ku dhex joog joogi jiray iyo fananad iyo qimaar xun, warba iskuma hayo, durbadiiba guriga ayaan ku cararay, aniga oo so galaya ayaa abaayo iga hortimid, madaxe qabsatay, “adiga o saan eh mad banaanka aaday abaayo” ayeey igu tiri, waxaan ku marmarsiyodan garan waayey, markasan iri “ee,ee maya abaayo, aniga oo

balkoonka taagana jawaalka/telefonka iga dhacay nohh.”

Qolkeygii ayaan dib uguso laabtay, oo sariirta ayaan xabad xabad isugu tuuray, waxaan billaabay inaan isaga uun aan ka fikiro.

Markii la yiraahdo dalxiis ayaa la aadana dhibka ku nacay, maanto dhan waan iska daba wareegoya walina ma aana is diyaarrin, famila iiga oo dhan anigey isugayan, oo waa ay wada diyaarsan yihiin, kama danbeyn anigu diyaar ayaan ahay, laakiin kabteydii ayaa iga maqan, kabihii aan ugu talagalay inaan ku labisto oo dharkeyga u eka ayaa kab iga maqan.

Aniga oo xanaaqsan oo sariirta korfadhiya ayaa abbo ii yimid, isagoo rabo inuu si fudud xanaqeyga u tirtiro ayu igu yiri “ow! Boqoradeydi waa ay careysan tahay, talow yaa wax ka haleyay”, markaasan la so booday, “aabo kabteydi ayaan la ahay”, kolkasu igu yiri “intaas basa, sug wax yar”, qoyska dhan ayuu isugu wacay, kolkasu yiri “kabta fardowsa aan wadajir ku raadino”, markiiba xanaaqii waa u i daayey, oo raadiskii ayaan dhinac ka galay.

Alla maxay farxad iyo reyn reyn badantahay,

markaad famila iigada aad farxad kuwada nooshihiin, oo markastana ay dhinacaga taaganyihiin, si ay kuu caawiyan.

Waxaanu maqalnay qeylada Cabaas, ahna yaraanka guriga, dhankiisa ayaanu ku wada cararnay, waba kan isago iska dhigaya HULK man, o dhahaya “aaooaah, I”m strong”, kaga daran xabadka ayuu kusii gargaraacanaya. Oo kabti gacanta ku haya, hulkigeena ayaan si farxad leh kor u qaad qaadnay, halkii ayaanu ka ambabaxnay.

Dalxiiskii Shaariqa

Dalxiiskii aan Shaariqa (sharjah) ku tagnay aniga iyo qoyskeyga, ma ahan midaan sahal uga sheekeyn

karo, iyo farxaddii aan wada jirka kuso wada qaadanay.

Shaariqa waa magaalo qadiimi ah, waana magaalada seddexaad ee imaaraadka ugu quruxda badan xagga dalxiiska, saase tahayna bilicdeedu kama liidato, magaaloyinka dunida ee loo dalxiiska tagay, waana magaalo taarilkhi ah.

Hadda waxaanu saaranahay sheedda sare ee baska korka kafuran, waxaan isha ku haya kamradeyda, waxaan sawiraya, meelkasta oo i cajab galiso.

Sida taalooyinka dhadheer, kuwa loo ekeysiiyay kutubka quranka iyo dhismahayasha taariikhiga ah, dadko idilna waa ay wada faraxsan yihiin.

Imika waa xilli casar liiq ah, waxaan ku suganahay huteel oo intii cawa aan seexan doono si aan isla birriba ugasii amba baxno.

Huteelkuna waxaa uu saaranyahay saaxilka badda, markii aanu wada cunteynay ayaanu soo aadnay, xeebta si aanu u daawano, dalxiisayasha kale duwan ee mesha isugu yimid, doomaha dalxiiska, iyo tartamada kale duwan ee ka socda badda dhexdeeda, haba ugu xiisa badnaadane kuwa dheelaya ciyaarta Surfing ka ama windsurfing ka.

Subaxdii xigtay.

Waxaanu soo aadnay dhanka saxaraha ee bacaadka badan, waxaaba la yaab leh, waxaanu ku socon weynay bacaadka oo dhamaanteen kabaha ayaanu gacmaha kuwada sidanay, quruxda ay caradu qabto ma cuntaha ku qabaneyso. Markii anu daalnay ayaanu ku leexannay, teendho yar oo lagu nasto, waxaaba xiiso leh koobka yaro shaaha lagu cabayo, xitaa 5-koob kala iiga kuguma filno.

Subaxdii seddexaad.

Waxaanu soo aadnay Souq Al-Arsa, iyo goobaha lagu iibiyo waxyaalaha qadiimiga ama dadkii hore ay isticmaali jireen. Meel walba dadba ku diyaarsan oo aad kusoo dhaweynayo, kuna barayo shey kasta iyo magaciisa xitaa ku jecleysiinayo ilaa ad ka iibsata, boorsadeyda wan qaadi la ahay, sidan waxkasto i cajabiyaba u iibsanayey, kaddib waxaanu ka hakanay bixitaankii isdaba jooga ahaa, waxaan maalmo ku qaadanay huteelkii xeebta saarna.

Imika labadiii asbuuc aanu ugu talagalnay inaanu shaariqa kuso dalxiisno, waxaa inoga harsan seddex maalmood , barrina waxaanu u socona in aanu soo booqano madxafyada (mesuamska), iyo

goobaha caruurta lagu cayaarsiyo.

Haddii aad maalintiyo dhan soo daasho, wali habeenkii ciil ayaa kuu sii hayo, oo habeenkii ayaaba kasii qurux badan, jawiga maalintii. Kolkaad istaagto sheeda sare ee dabaqa, ishadu waxa ay qabaneysa magaalo wada iftiimeysa iyo leyrarka kala ceynka ah, sida kuwa gaduudka, cagaarka, yellowga iyo baluuga, nalalka cadaankuba waa ay ku yaryihiin magaaladu. kamiradeyduna kama daasho iney sawirta bilicda qurxoon ee shariqa.

Subax kalo xiiso badan.

Waa subax ka xiiso iyo qurux badan subaxyadii hore, jawigu aadbu u qabowyahay, hada waxaanu sii galeyna madxafkan gudaha ayanu sii galnay, waxaan sii galeyna albaab yaro ay ku qorantahay, (the iron age 1300-300 BC), waa meel aad ku cajab galineysa markaad soo dhex istaagto, waxa ay leedahay qeybo kale duwan, hadda waxaa ay isheenu qabaneysa, wax yaabo qadiimi ah, waxaaba kasii daran meeshan imika soo galnay, waxaadba moodaa inaad so gashay bartanka badweynta hindiya, oo waa meel wada dhalo ah, kor kaga hadad eegto ama hoostada eegto waa isku mid, xitaa dhinacyadada waxaa kaliyo ku muuqanayo kaluunka kale ceynka ah, ee aadka u

quruxda badan. Aniga oo aad ugu mashquulsan sawirashada indha darandarkan ayaa Cabaas iga dafay kaamiradda, kolkasan kadaba orday, aniga oo ka daba haadaya ayaa qof garabka ku dhuftay, dib ban uso jeestay si aan u raalli galiyo. Waaba isagii, waa wiilkii aan roobka dartii isu barannay, waa cajaaib intana maxa keenay, kolkasu inta aanan kalmad dhihin ayuu gacantiisa kor uso qaaday, dabadeedna waaka farihiisa ii dhaq dhaqaajiyay, isago ileh “ilal liqaa”, wuuba iska sii dhaqaaqay, waan kasoo daba orday, oo garabka ayaan qabtay si aan uso jeediyo, markaan soo jeediyay, ayaan ku dhahay “adigu markasta aan is ira la hadal wad iska dhaqaaqda, xitaa jaanis waad iisin weyday, aan kugu mahadceliyo?”, kolkasu inta dholacadeyay ayuu igu yiri “qofkan jaanis u siiyo inuu ii mahadceliyo, waa qof aan rajo ka qabo inuu ila saaxiib”,

Markasu si kadis ah igu yiri “ma ila saaxiibeysa?”, anigu kadis bey igu noqotay oo dhinacyada ayaan eeg eegay, waxaan ku jawaabo ayaan garan waayey, kolkasu si daggan igu yiri “haka baqin, sidii beydhkii ayaan ku dhowraya”, kolkasan madaxa u ruxay, aniga oo hoos eegayo, markasu telefon nambarkeyga iga qaatay.

Maalintaas wey iga duwaneyn, maalmihii hore nolosheyda uso maray, oo farxad iyo wehelba waan dareemayey, sababtoo ah waxaa nolosheyda kusoo biiray inankii aan doon doonayey, wuxuu igu noqon doonana ma ogi.

Markii aan safarkii ka noqonay oo aan abu dhabey ku so noqonay, ayuu xirirkeenii sii xoogeystay, ilaa aan ka haray, baskii aan raaci jiray, i mean, galabkasta gaarigiisa ayuu iguso qaadi jiray, ilaa guriga.

hadiyado kale duwan ayuu galabkasta lama filan igaga dhigi jiray, xitaa mararka qaar shaqada ayaan dhaqso kaso bixi jiray, si aan waqti uguso wada qaadanno meelaha kafateriyada, ilaa aanba mooday inuu yahay qeyb iga midda, jacaylka faraha badan ee aan u qaaday awgeed.

Jacaylka, naxariista, af macaanida, ma umaleyn xitaa iney jirto gabar iga farxad badan dunida, waxaan dareemay dhadhanka nolosha, wala iigay horay jacayl imusan so marin, laakiin jacaylku waa nolosha ugu macaan ee lammaane dhex maro.

Labo bilood ayuu xiriirkeen socda, laakiin ma moodo labo bil iyo wax lamida, ee waxa ay ila tahay inaan sanado wada socono.

Lama filaankii igu farxadda badnaa waxaa uu ahaa, waxa ay gabarkasta jeceshahay iney ka maqasho lammaaneheda waana iney midowaan, i mean, inaan is guursanno.

Aadban ugu farxay arrintan oo waxaan ku dhahay “waalidkeyga mala wadagi kara?”, wuxu igu yiri “maya xabiibti, waxaan raba inaan lama filano uga dhigno arrintan, ee hadda ma ahan”, sidii ayaan isku afgaranay.

Maalin ayaa waxaa dhacday inaan ugu tagay huteelkii uu dagana, si aan hadiyad lama filan uga dhigo, wan garanayey qol lambarkiisa, kolkan ilinka qolkiisa imid ayaan wacay oo an ku dhahay “fardowsa waaye, ee iridda iga fur”, kolkasu yiri “irada iga fur aa, what the fuck, maxad mar hore iguso sheegi weysay”, waxaan ku dhahay “waqti aan doodno ma joogne iga fur”, kolku albaabka iga furay ayan islaab galinay, markasu igu yiri si xishood leh “soo dhawow, haddan ogaan lahaa inaad imaneyso, qolka waan sii kale habeyn lahaa”, waxaan ku dhahay “no.no.no wax dhiba malaha, ani shisheeye kama ihi”, “sweety, give me two minutes” ayuu igu yiri, suula iiga ayuu galay, intuu suula iiga ku jiray ayaan inta boorsada meel saartay, qolkii habeys u galay.

Markii u soo baxay ayuu qolkii oo tagan dhinacba mar eegay, indha ayuu gacmaha saartay, isago aadan isha u dhameyn karrin farxadda wajigiisa saaran, kolkasu ku qeyliyay “ow my god, ileen guriyeysan gabari joogin waa dib jir.”

Markasu gacmaheyga qabtay isago indhaha indhaha igu hayo, marba marka ka danbeysa aad ayaanu isugu soo dhawaaneynay ilaa ay bishimaha yaga istaabteen. Durbadiiba waa uu iga fuqay, aniga oo is leh, maxa helay. Wuxuu toos u abaaray albaabka isago si fiican u sakatuureyay, kaddib ayuu nalka damiyay, kaliya midka jiifka ayuu reebay, isago diidan iney kamirada qolka ku xeran na duubto.

Aniga oo sariirta kor waran, qeybna ay lugaha dhulka ii yaaliin, ayuu isku keyso kor tuuray, ilaa uu xadka ka baxay, waxaan indhaha kale furay isago xabadkeyga gacmaha kula jira, waxaan isku dayey inaan celiyo, “boyya please, saan qalad waaye, iga dhaaf”, “come on sweety, waa caadi. Mardhaw ayuu guurkeena dhacaya maxaad isku xumeyneysa.”

Laakiin wuxuu igu qancinayey ineysan wax dhiba laheyn, ee uu guurkeenu soo dhawyahay.

Aniga jacaylka xad dhaafka ah ee aan u qabo, ayaa

wax waliba igu kalifayo inan u ogolaado, aniga oo hoos iska leh, “amaad jacaylkaada weyda ama uu kaa fogaada” isagana wuxuu doono ayuu iga sameysan jiray. Asbuucyo ayaan kulmeynay mar marka qaarna inaan xadka ka baxno ayuu igu kalifi jiray, laakiin anigu marnaba kumana faraxsaneyn.

Maalin jimco ah ayuu iso wacay, waxaa uu igu balamiyey, kafateriyihiin aan ku kulmi jirnay, waxaan isku dayey inaan ka diido, laakiin waxaa igu yiri “waxaan raba inaan arrin muhiim ah ku sheego’, haye ayaan ku dhahay.

Si aan kuso baxo ayaan garan waayey, sababto ah waalidkeyga iguma aysan aqoon inaan guriga kaso baxo maalmaha fasaxa aan shaqada ka ahay, aniga oo aanan hooyo la socon. Laakiin maalinta waxaan ku marmarsiyooday, inaan soo booqanayo gabar xanuunsan oo aan xafiiska iskala shaqeyno.

Sidii ayaan kuso baxay, kolkii aan u imid oo aan cabbaar shekeysanay ayuu ii sheegay, iney shaqo deg deg ah kuso baxday o hal asbuuc shiinaha ku maqnaan doono. Arrintii ayaan ka yar xumaaday, laakiin wuxuu aad igu qanciyey marku soo laabto shaqada koobaad uu qaban doono iney tahay guurkeena, aadban u farxay oo waxaan ku macsalameyay “nabad iigu soo laabo.”

Muddo labo asbuuc ayaa laga jooga inta u maqan yahay, wax war ahna kama hayo, waxaan billaabay fikir iyo isla hadal, marna waxaan isku qancinayey iney shaqadii ku adkaatay, oo sidaa uu igaga soo daahay, markasta aan xiisihiisa taba waxaan wehel ka dhiganayey, alaabihii uu hadiyad ahaanta igu keeni jiray oo qolkeyga sidii biladihii ugu sharaxnna, marna waxaa fariisan jiray meelihii aan waqtiga kusoo wada qaadan jirnay.

Waxaan sugaba waxaan xaqiiqsaday inusan dib uso laaban rabin, maadaama uu iga maqan yahay muddo bil ah.

Waxaan isku arkay xaalad aanan horay iskugu arki jirin, wan garan waayey halka la iiga heesto, iyo sida la ii hayo. Shaki ayaa i galay oo isbitaalka ayaan deg deg ku aaday.

Baaritankii aan maray ka dib, waxaa igu dhacay argagax farabadan oo waxaan sameeyo ayaan garan waayey, oo waxaa iguso baxay UUR.

Meel aan wax ka billaabo ayaan garan waayey, laakiin maalinta waxaa ii dhacay nambarkiisa whatsappka, waa uu iga qabtay. Durbadiiba waxaan ku qeyliyay “Ibraahim.”

Waxaa uu igu yiri “haa waa isage, yaa rabtay?.”

Waxaan ku dhahay waa “waa gacalisadadii fardowsa, ee ibrahim so ma tihid”, waxaa uu igu jawaabay “haa laakiin, ani wax aqoona kuma lihi”, waxa uu shaki iga galay lambarka oo dhagta inta ka qaaday ayaan hubis u galay, wax waliba waa ay saxan yihiin, codku waa codkiisa.

Waxaan ku dhahay “ibraahim, waa ku baryayaa ciyaarta iga dhaaf noh, xilli la ciyaaro lama taagne”, waxaa uu igu jawaabay “gabaryehey waqti lumis ayaad wada he, aniga kuma aqaanno, ee qofka ka maqan raadso.”

Talefonka ayuu igu damiyey, markaan ku celi maagayna, lambarka ayuu iga dansaday, dhulka ayaa ila wareegtay oo meel la iiga xigo ayaan garan waayey. Talo fareheygana waa ay ka baxday, oo qof uur leh ayaan ahay.

Waxaan isku dayey inaan raadiyo, halka uu daggan yahay ama wax adrees ah oo lagu raadin karo, xitaa huteelkii uu dagana ayan tagay, oo waxaan isku dayey inaan wax aqbaar ah ka helo, laakiin waa ay iga diiden.

Aniga oo ku oynaya meel aan sida uga fogeyn,

huteelkii uu dagana ayaa waxaa i aragtay gabar huteelka ka shaqeyso, waxa ay isku dayday iney i caawiso. Markii aan u sheegay dhibka i heysa ayeey ii ballan qaaday, iney ii keeneyso wax walbo ku saabsan wiilkan arrintiisa iyo aqbaarta uu huteelka ka hayo.

Waxa ay igu ballamisay maqaayada KFC ee khalifa city, markii aan imid ayeey ii keentay warqado ay ku qoran yihiin aqbaarto idil.

Waxa ayna igu tiri “in la bixiya sirta macaamiisha waa nagu qalad, marka inaad xafido isku day, haddii laygu ogaado arrintan xitaa shaqadeydan ku weyn kara.” Sidii ayaan ugu mahadceliyay oo abaalka ee ii gashay dartii waxaan isku dayey inaan lacag siiyo, laakiin waa ay iga diiday.

Markii aan tix raacay, war bixintii aan huteelka ka helay ayaa waxaan ogaaday inuu ka yimid dalka kanada (canada), ee uu seddex bilood oo fasaxa ku qaadanayey dalkan imaaradka.

Waa cusub ayaa ii baryay, oo waxaan ogaaday jacaylkii, hadiyadihii iyo wax waliba iney ahayen daneysi iyo ku meel gaar.

Marba marka ka danbeysa caloosheydana shaaca

ayeey kasii qaadmeysa, xitaa shaqadii niyad waan u yeelan waayey, oo maamulihii iyo qoyskii waxaan u sheegay oon ka dhadhiciyey inuu istareys igu furan yahay, ilaa shaqadii bil fasax ah la iigaso siiyay, si uu jawigeyga caafimad uso dago.

Qoyskana waxaan u sheegay in muddo bil ah, ruqso laiso siiyay, oo aan rabo inaan mudadas aan dalka ka maqnaado, aabbo ayaa igu yiri “waa sax gabadheydi, soomaaliya ayaan ku diraya oo adeerka ayaad bishan la soo joogeysa.”, sida ayaan halkan ku imid. Hada waxaa ii sura gashay inaan cunugii usan banaanka iman oo igaso dhacay.”)

Sheekadii fardowsa ayaa i dhalan rogtay, oo aniga xitaa iga sii daran. markii aan guriga tagay ayaa waxaa maskaxdeyda buux dhaafiyen su’aalo badan oo ay kamid tahay, maxay sirteeda kugu aamintay sidan fudud, iyadoon aqoon dheeraad ah ku laheyn?, maxay kaga dhigatay ruux ay ku sir qarsato oo ay dhibteeda u sheegato?

Waxaan go’aansadey inaana iska fogeyn oo aan niyadda kadilin maadama uu qalbigeeda horay u dhaawacna aniga aan dhaawac kale ugaysan oo ayna iga dhigatay ruuxa kaliya ee ay ku kalsoonan karto.

Marwaliba aan lajoogo, waxaan dareema cod dhagaheyga meel dheer ugaso dhacayo oo ileh, waa amaano kaga timid dhanka Caaliya ee ilaali amaanadan. Maalintii danbe ayaan u imid markaan wax yar sheekeysaneyno ayaan ku dhahay “fardowsa, waxaan raba inaan kula saaxiibo, maiga ogolaaneysa?”, hadalkeyga waa ay rumeysan weyday, mar wajiga ayeey gacmaha saarata, marna waa ay iso eegta, neeftuur iyo faraha iney mar isdhex galiso marna kala saarto ayeey bilawday, waxa ayna igu tiri “yaawaye, nacaska saaxiib ka dhiganayo gabar xun oo ilahey ku caasisay oo xadka ilahey gudubtay?, haddana ceebteda aad ogtahay miyad u bareereysa inaan saaxiib ka dhigato?”, waxaan ku dhahay “Haa, intaba iyado ah oo aan ogahay ayaan raba inan saaxiib ka dhigto, aadamoho idil ayaa ilahey uwada gafo, hadana markasta towbadu waa ay furantahay, waxaan diyaar u ahay inaan boogta qalbigada ku taalo dawo u noqdo.”, miiska ayeey madaxa saaratay, waxaan ku dhahay “fardowsa meel bulsho ayaan dhex joogna, fadlan ooyinta iska daa oo madaxada kor kadhig, daciif ma tihid, qaladkuna waa uwada simannahay.”

Halkii ayuu waa cusub inoga billawday, qorax dhicii waxaa ay igusoo dooni jirtay gaari uu adeerkeedu

leeyahay, ilaa ay guriga iridiisa igeysa ma aysan iga yeeli jirin, dhex ka noqo, markasaan si kaftan ah u dhihi jiray “sidii wiilkii miyad aniga jaceyl igu abuuri rabta kadibna aad imaaradka iiga dhuuman rabta.”

Waxaan marwaliba kawada sheekeysan jirnay nololsheeni hore iyo wixii nasoo wada maray.

Markii aan shaqada kaso baxay ayaa maqlay hoonka gaarigeeda, waan uso deg degay, markii aan cabbaar sii soconay ayeey iga codsatay inanu huteel halka ka dhawaa aan ku leexanno si aanu waqti uwada qaadanno.

Markii aanu cabbaar sheekeysaneyno ayeey igu tiri “waan bixi rabaa, oo waqtigii fasaxa ayaa iga dhacay”, markii ay warka igu tiri ayaa dhuunta dhan i qalashay oo aan hadalba igaso bixi waayey, waxaan niyada iska iri “maxa nasiibkeyga sidaan ka dhigay, oo aan u waaya waxkasto aan la jawi qabsado”, waxaan ku dhahay aniga oo qarsanayo waxaa qalbigeyga ileeyahay “waa sax, ileen waqti kooban ayaad soo codsatay”, waxa ay igu tiri “wajigada muxu isku badalay markaan arrintan ku sheegay, ma jecleysan miyaa waxaa an kuu sheegay?”, waxaan ku dhahay “maya..maya waxba majiraan, adigale kula noqotay”, si walbo aan u inkiray, haddane nafteyda been uma sheegi karrin

oo wan ka naxay bixitaankeda, waxa ay iiso bandhigtay arrin kale, waa arrin hami igalisay, laakiin aan ka cabsaday iney fashal igaliso.

Waxa ay ogeed xirfadeyda cunta karinta ah ee aan qibrada u leeyahay, waxa ayna iso bandhigtay inaan ganacsi maqaayad ah kawada billaawno Abu dabey, ee dalka imaaraadka, waxayna iga dhaadhicisay inaan hormar badan ka sameyn karno halkaas, aan nolosheyda isbadal u horseedi karo, waxaan ku dhahay waa arrin aan fududeyn oo in laga soo fakaro u baahan, go'aankeeda aan sahal ku gaari karrin, waxa ay igu tiri "aniga deg deg iguma jiro, ee adigan jawaab ka sugayaa."

Arrintii ayaan qoyska ula imid, hooyo iyo habo Leyla waa ay igu raaceen, laakiin aadban uga labalabeynayey, markii danbe ayaan go'aan ku gaaray inaan cabsida iska saaro iyo shakiga ee an dhaqaaqo, si aan riyooyinkeyga u rumeyo.

Waxaan muddo ka daba wareeganayey dal ku galka imaaradka, ugu danbeyna waa ay ii suurto gashay, oo maalmo kaddib waxaan ka daganaya caasimadda imaraadka ee ABU DABEY.

Safarkii Abu dabey

Waxaan soo caga dhigtay garoonka weyn ee Dubia, waa garoon aad u mashquul badan, diyaaraddaha kacayo iyo kuwa dagayo ma ahan kuwa xad leh, marka aad so gasho gudaha elaboorka qeybta (Arrival-ka iyo Terminal 3), waxaanba dhihi kara waa eleboorka dunida ugu mashquulka badan, dadku waxaa ay ku jiran feelal dhardheer, cidkasta waxaa ay sugeysa inta laga hubiyo dalku galka uu sito.

Waa markii igu horeysay nolosheyda aan imid halkan, waxaan aad ula dhacsanahay bilicda gudaha eleboorka, waxaa aad logu xardhay, muraayado(quraarado) iyo shaahado aad u waweyn, kaamirooyin ayaa dhankasta ku xiran, waxaana aad looga taxadaray ammaanka oo waxaa halkan ku sugan ilaalo aad u badan oo dad iyo aalado isugu jiran, mararka qaar waxaadba arki meel uu mashiinka uun ku adeegayo ee aysan cidna joogin, waxaa i hagayey ishaaroyinka u diyaarsan dadka goobta ku cusub iney hagaan, waxaan wacay fardowsa, laakiin waa uu ii dhici waayey qadka o iga

cusla awgii, markii aan boorsoyinkeyga iyo wixi aan wato dhan aan saaray mashiinka iskanka, ayaa waxaa ii muuqday shaashada telefonka wicitaanka fardowsa, markiiba wan kadaba tagay inta uu dhinaca kale u gudbin, markii aan ka qabtay ayeey igu tiri “walaal Axmed makaso gudubtay gudaha”, waxaan ku dhahay “haa, haddan maraya baaritankii ugu danbeyey”, markii aan so baxay ayaan waxaan billaabay inaan dadka ka soo dhex saaro, meesha waxaa buuxa dad badan oo sugayo, eheladooda, saaxiibadooda iyo mudanayashodaba.

Waxa ay isheyda qabatay Fardowsa oo ii gacan haatineyso oo dhankeyga uso deg degeysa, waxaa wajigeeda ka muuqday farxad xad dhaaf ah, waxaana halka inooga bilowday safarkii nolosha, safarkii hormarka.

waxaan si toos ah uso aadnay magaalada Abu dabey, imika waxaanu saaranahay baska ka baxay dubia ee aada magaalada kale ee Abu dhabey, nin iga xigay dhanka daaqada gaariga ayaan ka codsaday inuu booska ii badalo, waxaa uu igu yiri “ma markaagii kugu horeysa oo aad timid dalkan”, aniga oo dholacadeynaya ayaan ku dhahay “haa, dabcan”, waxaan fariistay booska daaqada gaariga, waxaan daawanaya dhismayashan cajiibka ah ee

kale ceynka ah, wadooyin waaweyn oo aad u nadiif ah, waxaad daremeysa iney tahay magaalo kamida, magaaloyinka ugu qanisan dunida sida deg dega ah ee uu ganacsigedu usii korayo.

Waa magaalo aan boos uga banaaneyn maskiinka aan wax heysan, waana magaalo so dhaweyneysa maalqabeenada iyo ganacsatada.

Magaalada tan qaniga ah, ku noolan sheheeda waxaa ay dhib ku tahay masakiinta, waxaa ayna raaxo u tahay maalqabeenada, inkasto ay aad u buuxan dadka muruq maalka ah oo ayna ka xamaashan halkan.

saacaddo kaddib waxaanu soo gaarnay Abu dabey, gaar ahaan mesha lagu magacabo al khaalidiyah , dhabarka danbe ee moolka weyn ee Al bateen.

Waxa uu ahaa safar aad u dheer oo daal badan. Waxaan saacado isaga gooshay min Muqdisho ilaa abu dhabey.

Neerfaha madaxa ayaa sidii fareejooyinka gaariga i sanyaaleynaya, oo ay iga maraysa ilahow marle igey meel aan ku dhar dhigto, kaaga darantii kabaha buudhka ah iyo sigsaanta ayaa aad cagaha iga gubaya. Taaygii qoorta igaga giijisna mar horaba

iska furay oo an shandada ku riday.

sidaan u sii soconay waxaa ay igeysay, dabaq aad u weyn oo ilaa lix biyaano ah (lix fooq), waxa ayna durbadiiba furaha ka qaadatay qolooyinka kireyayaasha, waxaan arka iney mar hore isii kireysay qolkan dagi laha, xitaa waxaan boorsadeeda ku arkay warqadda lacag bixinta ee ay hormarisay, muddo dhan 6 bilood, ma aqaanno intaan o dhan oo asxaan ah waxa ay igu galeyso Fardowsa. Imika waxaanu sii galeyna qolkii aan dagi lahaa, waa qol yar oo aad loo qurxiyay.

Qolka waxaa dhex yaallo sariir hal nafar ah, dhanka kale waxaa yaallo fadhi, kaso horjeedkiisuna waxaa ku dhagan shaashad/television weyn. Bilicda qolku aadbey kuu cajabineysa, dhinaca kale waxaa uu leeyahay, balcon yar oo aad ka daawan karto sheedda sare ee magaalada, waxaa laabka kusi dhagan musqul/suuli yar.

Waanu so wada baxnay oo waxaan so wada fariisannay meel laamiga dhinac ka saaran oo baar yar oo kafeyga lagu cabo ah. Hadda waxaa an dareemaya nashaad badan, oo waa an ka soo meedhay dhididkii aan qabay iyo daalkiiba, hadda waan nafisay oo waxan xiranahay fanaanad yaroo qabow iyo dabagaab, oo imika waan sheekeyn kara,

halkii ayaan hadal ka billaabay Waxaan ku dhahay “fardowsa maxa abaalkan oo idil igu sameyneysa?”, wey yara qososhay kaddib ayey igu tiri “qalad miyan ku leeyahay waxaa aan sameynayo, xaqna uma lihi miya inaan garabkaga istaago maalintad ii baahantahay, adiguba waxaad garab ii noqotay, xili aan heysan aadame kale oo dhibkeyga dareemaya.”

Waxaan ku jawaabo ayaanba garan waayey, waxayna igu tiri “waad daalantehee naso, bari ayaan is arkeyga insha allah.”

Fardowsa waa gabar qalbi furan oo garaneysa sida abaal loo galo iyo sida loo gudaba, waxa ay ka shaqeysa bangiga weyn ee National Bank Of Abu dabey, waxa ay curad labaad u tahay qoyskeda, waxaa ka weyn gabar la qabo, waxaana ka yar labo wiil iyo hal gabar oo aan wali school dhammeyn, aabbeheed waxaa uu ka shaqeya shirkadda batroolka ee safwan petroleum and technologies.

Qalbigeygu waxaa uu igu goobabinaya inaan gabadhan kaliya abaalkeda ku gudi karo inaan nolosha la wadaago, oo aan farxada dunida taalo oo idil inan hoosteda keeno, laakiin marabo iney markale igu dhacdo dhibkii horey ii gaaro kale, oo aan kaliya ku e kaado saaxiibtinimada.

Markii aan isku darsanay wixii lacag aan heysanay si aan ganacsiga maqaayada ugu furno ayaa inoo dhammaan weysay, waxaan dareemay niyad xumi, oo waxaan keydinayey labo sanno, oo aan Muqdisho kala imid iyo fardowsa keedkeda markii laisku daray waa ay noo gaari weysay halkii aanu ka rabnay, waxaana so jeediyay arrin ah inaan shaqeyno muddo kale si aan u dhameystirno lacagta inaga dhiman.

Waxa ay igu tiri “arrin ka fudud ayaa ino hayaa, oo ah inaan deen qaadanno, oo aan dib u celinno markaan shaqeyno.”, waxaan ku dhahay “waa arrin aan ila sahlaneyn, hadhow hadii aan qasaarno kawaran, so dhibato inaguma imaaneyso.”, waxa ay igu tiri “geesi aan ku kalsoonahay ayaa tahay, waana hubaa inaad, dib u celin doonto deeynta”, sidii ayaanu ku go’aansaney inaan deen qaadanno. Markii aan helnay lacag inagu filan oo aanu aasaasi karno ganacsigena ayaa Waxaan dhexda u xiranay sidan u furi laheyn maqaayada, waxaan har iyo habeen ka daba waregeynay oo aan sharci kasta uso mareynay furitaanka maqaayadan oo markii danbe inoolasoo ogolaaday.

Waxaan wada fadhinay baar kafey, waxaan ka wada fikireynay waxaa aanu u bixin laheyn

maqaayadenan cusub, waxaan ku dhahay “fardowsay magac doorista adigan ku daayey, ee magac ku wanaagsan u bixi”, xitaa waxaan soo jeediyey inaan iyada ugu macag darno maqaayada o aan “Firdows Restaurent” ku magacaawno.

Waxa ay igu tiri “adigu taariikh dheer ayaad leedahay, waxaadna so martay nolol adag oo wajiyo kale duwan leh, dabcan anigu rafaad kumana so korin, marka magac cajiib ah ma bixin karo, waxaan raba inad magac kaso xusho, dhibkii ugu adkaa ee kuso maray, ama shey uu dartii dhib kuso gaaray”, durbadiiba waxaa maskaxdeyda ka dhex qeyliyay shaqadii aflagaada laigu geystay, darteed aan jacaylkeygii ku waayey, aana darteed maanta kula joogo fardowsa, tasoo ah shaqada kabalyeerinimada, halkiina ayaan uga dhawaaqnay magaca Kabalyeeri Restaurent.

Waxaan billaabay inaan si adag u shaqeyo, waxaan ka tagay wax layira raaxo ama nasiino, marwaliba waxaa ii muuqday labo hadaf oo kale ah : inaan gudo deynta aan ku maalgalinay ganacsigan iyo inaan hormar cad oo la taaban karo ka gaaro shaqadan.

Xafladda furitaanka maqaayadda kaddib, waxaan so shaqo galinay, seddex wiil oo kale ah labo wiil oo

yamani ah iyo hal wiil oo masaari (egyptian) ah, si ay ila shaqeyan, waxaan xilli walba u taagneyn qancinta macaamisheena, waxaan awoodnay iney nagu so xerman macaamiil kale duwan waayo waxaanu sameyn jirnay cuntoyin badan oo dalal badan laga xiiseyo sida dalalka kala ah : hindiya, masar, yemen, soomaalia iyo imaraadkaba.

Waxaan marwaliba sii hormarin jiray, xirfadeyda cunto karinta, waxaan galinka hore ilaa galabtii aan joogi jiray maqaayada, casarkii kaddib waxaan howsha uga sii tagi jiray fardowsa, waxaana galinka danbe ee galabti dhigan jiray iskuul lagu barto cunta karinta, waxaan ka soo rawaxi jiray sideeda fiidnimo, kaddib ayaan kuso noqon jiray isla maqaayada, kaddib ayaan fardowsa xaafadeeda u kaxeyn jiray.

4 sanno kaddib

Maanta waa aan ka awood badanahay, maalintii aan dalkaan imanayey. Aniga o saboolnimo la ciir ciiraya, waa aan ka kalsooni badanahay, maalintii aan dalkan imanayey aniga o ka cabsi qaba inaan guuldareysto. Aniga iyo fardowsa waxaa aan halgan adag usoo galnay heerkan aanu maanta taaganahay, waxaanu nahay dad sharaf iyo hanti intaba kasbaday, waxaa aan maqaayada faraceeda

labaad ka furnay isla magaaladan, meel u dhaw xeebta al bateen ee Abu dabey, waxaan aan qorsheyneyna inaan faraca seddexaad ka furna magaalada Dubia, waxaan sheerar waaweyn ku leenahay huteelo badan oo ku kala yaalo isla imaaradka dhexdiis, waxaan furnay iskuul lagu barto cunto karinta ee ku dhex yaallo magaaladda ganacsiga e Dubay.

Aniga iyo fardowsa waxaanu isla soo wada marnay dhib iyo dheef, xigmad ayaa dheheysay “gabadha kartida leh waxa ay ku aaminta oo ayna ku garab istaagta xilliga aad faro maranatahay.."

farxaddeenu waxaa ay ka billaabatay, markii aanu dib u celinay deentii bangiga, laakiin isla sanadkaas waanu qasaarnay oo waxaa ina soo wajahay musalaf (bankruptcy) iyo niyad jab weyn, waxaanu bixin weyney mushaaradka shaqaalaha, waxaan shaqo ka billaabay iskuulkii aan ka baranayey cunta karinta, si mushaarka aan ka helo iyo mushaarka ay fardowsa bangiga ka qaadato aan ugu bixino mushaaradka shaqaalaha iyo alaabta ay u baahanta maqaayadda.

Waanu kasoo gudubnay oo maanta waxaa labada farac ka shaqeeyo shaqaalo dhan dhowr iyo toban ruux, waxaa sii dheer iskuulka cunta karinta oo ay

ino joogan, labo macalin oo talyani ah, hal hindi ah iyo labo shiineys ah.

Waxaan si kadis ah fardowsa uga codsaday guur oo ay aad ugu faraxday, waxaan ka doontay ehelkeda, maanta waxaan aaminsanahay ineysan cidna igu ciili kareyn hanti oo waxaa ay hantideydu kor u dhaafeysa labo milyuun oo dollar, marka aad hanti leedahay, cidkasta waa ay ku qadarrineysa, laakiin anigu wanaaga lacag kaliya kumana kasban ee waxaa soo bandhigay dabci wanaagsan iyo ixtiraam oo aan dad badan ku kasbaday.

Waxaa si weyn u dhacay arooskeenii oo ay kaso qeyb galeen dad badan oo sharaf leh, sida kuwa aan ganacsi ku shirkownay iyo kuwa aan isku baranay shirar ganacsi iyo qeybaha kale bulshada. arooska qeybtisa kalena waxaa uu ka dhacay Muqdisho oo ay dhiganayen ehelkeyga.

Fardowsa waxaa ay iga codsatay inaanu todoba baxa u aadno mombasa, kiinya. Kama diidi karo boqoradeyda waxa farxadeeda ah, waxaanu soo jaranay tikidhadii oo waxaanu soo aadnay magaaladda dalxiiska ee mombasa.

Todoba bixii Mombaasa

Mombasa waa magaalo xebeed, dalxiiiska aad ugu wanaagsan, waa magaalo qadiimi ah, waxaa horay iyo gadaal isku dhaafaya, dalxiisayaasha ka kala yimid dunida daafaheeda, iyagoo usoo daawasho tagaan goobtan.

Markii aad magaaladan soo galeysid waxaa aad ku arkeysa labada faan ee dhaadheer ee maroodiga oo aargo ahaan wadada ku dhisan.

Waxaan nimid huteelkii aan sii carbuunay, dhab ahaanti waa huteel weyn oo aad u qurux badan, isma laheyn huteelkan oo kale ayaa afrika ku yaallo, waxaa lagu magacaba Englishpoint & spa, waxaa uu saaranyahay xeebta loo yaqaanno Nyali beach, waxaa aad kuso jiidaneysa bilicda huteelka iyo alaabta dhextaalo.

Shaqo adag kaddib, walwal badan kaddib, mashquul badan kaddib, imika mashquulka kaliya e ina heysta waa eegmada naxariista leh ee indheheenu is eegayaan, sheeko iyo inaan ku maadeysano waayihii adkaa ee ina nasoo maray.

Fardowsa iyo anigaba waxaa aan wada fadhina xeebta quruxda badan ee nyali. iyadu lugaha ayaa u fidsan aniguna waxaan ku jiifa dhabteeda, waxa ay ku falaadeysa timaheyga, mar indhaha ayeey iga daboosha, marna waxa ay itiraahda “aamus aan quruxdada daawade, oo indhahaga iga dabool, si aysan iga xishoodsin”, aniga wan dhibaya oo si tartiib ayaan indhaha u kala furaya, kaddib ayeey iga xanaqeysa oo ay i oraneysa “waad i qiyaantay maxaad indhaha u furtay.”

Waxaa ino dhammaaday maalmihii malabka, barrina waxaan dib ugu noqoneyna Abu dabey, ee dalka imaraadka.

Waayuhu kale duwan, subax kasta waxbu kuulasoo waa bariista, maalin aanan iloobeyn, maalin aanan waligey xasuusteyda ka tirmi doonin. Waxaa ay aheyd subax hore, anigu waxaa aan u deg degayey shir aan la lahaa ganacsato badan, fardowsa ayaan ka kiciyey, waxaana ku dhahay “xabiibti wan bixi raba, sakay ma bexeysid miyaa?”, waxa ay igu tiri “maya xabiibi, saakay waan caajisanahay bixitaan igama heyso”, waxaan hor taagna miraayadda, waxaan ku dhibanaa xirashada taayga, waa ay igu qososhay, markasey soo istaagtay oo ay ii xirtay, kolkaaysay igu tiri “wala iigaa ma baraneysid miyaa

xirshada tayga, hadii aan aniga kaa fogaado yaa kuu xirayo iisheeg?", madaxa ayaan ka dhunkaday, markasan ku dhahay "hadalada qaar afka uma wanaagsano, markale haidhihin waan ka fogaanaya." Durbadiiba wan baxay.

Waxaa inoo bilowday shirkii oo maalinta wax badan looga hadlay, waxaa dhammaaday wajiga kowaad ee shirka, waxaan usoo baxnay wax yar oo nasasho ah, cabbaar kaddib ayuu shirka dib inoogu billowday, markii uu wax yar socdayba waxaa isoo wacay maamulka huteelka, kama aanan qaban, haddana waa uu igu so celceliyay ilaa dhowr mar, markii danbe ayuu farriin iso diray waxa ayna eheed "mudane telefonka iga qabo, xaalad deg deg ah ayaa nalaso daristay e."

Durbadiiba wan wacay waa uu iga qabtay waxaa uuna war igaga billaabay "naga raalli noqo mudane, naga raalli noqo mudane", kaddib ayaa shaki igalay kolkasan ku dhahay "war naga raalli noqo ha lahaanine, waxaa jiro iisheeg?", waxaa uu igu yiri "ee mudane wan badbaadi weynay xaaskaga, balooga (departimentada) aad dagneydeen ayaa dab ka kacay oo dhowr qof ayaa ku dhimatay, oo ay xaaskadu kamid tahay haddane dhanka iyo isbitaalka ayaa loo qaaday."

Intaa wixii ka danbeeyey, ma aheyn xaaladeydu midan ka sheekeyn karo, duugteedii kaddib waxaa ila soo darsay, maqnaasho iyo fakar tiro badan, waxaan kuso koobmay aamusnaan.

Dadkii aan asxaabta la ahaa iyo dhammaan dadkii aan shirkadda eheen waxa ay igu qasbeen inaan muddo bil ah dalka ka maqnaado, si uu igaga yaraato dhibta iheysata, Waxaana howsheyda la wareegay oo sii waday, sakartaariyeheyga howl karka ahaa ee Tarek El noum oo kaso jeedo dalka masar (egypt) kana mid ah shaqaaleheyga kuwa ugu howlkarsan.

Waxaan si toos uso aaday dalka kiinya gaar ahaan mombasa, si aan niyada ugu dajisto xusuuseheeda.

Marwaliba oo aan nolosha ka quusto, oo aan geeridaba ka doorbida ayaa waxaa gudeheyga ka guuxaya cod hoose, o si hoose ila hadlaya oo i leh “Hadduu ilahey irid ka xidho, irid kale ayuu kuu furaa, wax waliba oo dhacay waxaa ay ahaayen wax qoran, qadartuna ma aha mid gacmeheena ku jirta, si kastood u fakarta awood uma lihid inaad dib uso ceshata wixii ka lumay.”

Marba marka kasii danbeysa fakarkeygu waa uu sii yaranayey, ilaa aan aaminay iney fardowsa ka

taktay meel dhib badan, ayna dagtay meel aan raalliyoyinku ku dhibtooneyn, oo aan iri “nabad igu joog halkaga, meel kaga qiimo badana allah ku geeyo.”

Sanadkasta waxaan iman jiray mombasa, si aan u weheshado, xasuusihii hore, si aan u dareemin inaan kali aheyn ee markasta ii dhawdahay gacalisadeyda.

Sanaduhu waa ay is gurayaan, saacaduhuna waa ay u kaalmeynayan, sanadkii seddexaad ayeey ii tahay oo aan mambasa imaanayo, geeridii fardowsa ka dib.

Maalmihii aan ku laaban rabay Abu dhabey, ayaa waxaan subax aan joornaalka ka aqristay in shirkad ay iibineyso sheerar, waxa ay niyadeydu igu cadaadisay inaan ka mid noqdo sheerlayaasha shirkaddaas, waxaana codsi u gudbistay maamulka shirkaddas si aan uga mid noqdo dadka sheerarka iibsanayo.

Shirkadda ayaa codsigeyga aqbashay oo waxaa ay igu xujeeyen inaan imaado, neyroobi. Markii aan tagay oo ay arkeen aqbaarteyda oo buuxda iyo ganacsigeyga ayeey iga codsadeen iney shir ila qaatan, maadaama aan ahay hantiile, si aan uga

talo siiyo sidey shirkadooda u sare kici laheyd.

Waxaa la iisoo diray mid kamida maalmulka shirkadda si uu kulankaasi ila qaato. Markii aan wada fariisanay oo aan aad u sheekeysanay ayan is fahanay oo si shaqsiyad ahaan isu sii dhex galnay, markasa uu mar qura billaabay inuu iska ooyo, waxaan garan waayey waxaa ku dhacay iyo sababta uu la oynayo, waxaa uuna igu yiri “wiilkeygi iskakey cafi, qalad weyn baan ka galay e”, waxaan ku dhahay “adeer maxa waaye qaladka aad ka hadleyso” , waxaa uu igu yiri “waxaan ahay Caaliya aabbeheed”, anigii fajac iyo amakaak ayaan afka la qabsaday.

Waxaa aan isku dayay inaan ka fogaado, isaga iyo shirkaddiisaba, waxaa uu ii sheegay inuu dartey Muqdisho u tagay, oo uu muddo dhan I baadi goobayey, iyo iney luntay farxada gabdhiisa iyo mida qoyskiisaba, qaladkii uu galay dartiis, wuxu igu yiri “wiilkeygi waad iska bixi kartaa o cidna kuma celin karto, laakiin farxada qoyskeyga gacantada ayeey ku jirta, heshiiska gabar iyo aabbeheed gacantaada ayuu ku jira.”

Dhag uma aanan sii dhigin hadalkiisa oo durbadiiba waxan ku soo laabtay mombasa, waxaana si deg deg ah visa ugu dhufsaday abu dabey.

Markii aan Abu dabey imaaday ayaa waxaa ku mashaquulay shaqadeydi, waxaan isku dayey inaan aniga is farxad galiyo, laakiin habeenkasta markii aan seexo is iraa waxaa maskaxdeyda ka guuxayo hadalkii uu igu yiri Caaliya aabbeheed Xusen.

Wuxu ka bixi waayey maskaxdeyda, oo markasta ereyadiisa ayaa maskaxdeyda kuso dhacaya. muddo 4 bilood ayaan isku dayayey inaan iloobo, laakiin xaqiiqdi inaan hilmaamo iska daaye, nabar ayuuba maskaxdeyda ku noqday, oo marwaliba aan kali noqdo waxaa maskaxdeyda sidii magnadkii usoo qabanayo ereydiisii.

Qoraaga iyo Axmed

Qoraaga: “Aadbey u xamaasad badantahay sheekadada, oo marba jawi cusub ayeey ku galineysa. haye bal isii wad.”

Axmed: “haa dabcan, nolosha ayaaba sidaa u wajiyo badan.”

Qoraaga: “koob kalo seddexaad oo koboshin ah, ma ino dalba?”

Axmed: “maya, walaal aysar.”

Qoraaga: “ Axmed waadba fakareysa he, Caaliya miya wax kalo ku dhici raban.”

Axmed: “maya walaal aysar, qisada ayaa inta iga eg.”

Qoraaga: “laakiin, qisadu waa qabye, maxaanu sameyna.”

Axmed: “walaahi garan mayo, ee adi sidee kula wanaagsan?”

Qoraaga: “Axmed mid maka codsan kara?”

Axmed: “Haa aysar, wad iga codsan karta.”

Qoraaga: “een bal kawaran haddii aad qisaddena dhameystirto?”

Axmed: “oo sidee ah?”

Qoraaga: “ee..Een..een. guurka Caaliya.”

Axmed: “maya..maya aysar macqul ma ahan midaa!.”

Qoraaga: “Saaxiib Axmed, maxaad iga diideysa arrintan, adiga waxaa dib kuguso noqonayo farxaddadii, oo noloshaduna waa ay dhameystirmi, anigana qisadeyda waa ay ii dhameystirme e.”

Axmed: “aadbey igu adagtahay, laakiin go’aankeyga kama danbeynta ah, dib ayaan kaga so sheegi doona.”

Sidii ayaanu ku kala tagnay, aniga iyo axmed.

Waxaan marwaliba ka rajo qabay, inuu taladeyda wax un u tarto, si ay wax waliba u dhameytirman, laakiin markasta o an telefonkiisa waco oo aan wada hadalno, jawaabta kama danbeynta ah ee uu isiinayey waxaa ay ahayd maya wali.

Aroor hore ayeey eheed, waxaan fadhiyey o u korsi ii yiilay barxadda dhexe ee guriga, jawiguna aad bu u dagana oo waxaan waqti la qaadanayey buugga

uu qoray Dr.ca'id al qarni ee lagu magacabo "DON'T BE SAD", waxaan maqlay dhicitaanka telefonkeyga oo qolkeyga ka dhacay, markiiba wan kacay oo dhankiisa ayaan aaday.

Kolkii aan telefonka so qabtay waxaa iso wacaya waa Axmed, niyada ayaan ka farxay. oo waxaa i farxad galin doona ayaan ka filanayey, laakiin waxaa u isoo wacay si uu ii macsalameyo, oo subaxa waxaa uu ku sugna eleborka Muqdisho.

Si wanagsan ayaanu isku macsalameynay, inkasto aan niyad ahaan ka xuma, taladii uu igu gacan seyray. sida ayeey qisadii ku qabyowday, oo buuggii aan ku qorayey, waxaan iska saaray, armajada buuggaagta aan ku keyd sado dusheeda sare, waliba aniga oo indho quus leh kusii eegayo.

Muddo hal bil kaddib

Waxa ay eheed 3-dii bisha meey, waxaa sanka lagu carfinayey curashada bisha ramadan. Waxaan hooyo laso iibinayey maacuunta bisha ramadan, oo suuqa bakaaro ayaan wada joognay, waxaan dareemay gariirka telefonkeyga oo jeebkeyga ka dhacayey, kolkii aan jeebka kaso saaray oo aan eegay lambarka iso wacaya, ma ahan midan garanay, laakiin waa lambar kiinya ah.

Wan ka qabtay, “walaal aysar, wan ku salaamay, munaasib ma tahay inaan xilla iigan kula hadlo?”,

Waa Axmed waxaa isoo wacaya, aad ban ugu farxay. waxaan ku dhahay “haah.haa walaal, laakiin 2 daqiiqo kaddib igusoo celi .”

Hooyo ayaan ku dhahay “hooyo macan, arrin yaran raba inaan telefon kuso dhameysto, ee waan kusoo labana”, inta i eegtay ayeey igu tiri “farxad ayaaba indhahaga ka muuqate, ee orodo dantada so dhameyso, dareenkaga xakame oo tartiib u soco.”

Meeshii igu dhaweyd ee an fariistay waxaa ay aheyd maqaayadda weyn ee Zeytuun Palace oo dhanka wadada howl wadaag bakaaraha kaga taallo, kolka ayaan telefonka dhegta saartay oo aan boorsadeyda kala so baxay buug yareheygii iyo qalinkeyga, halkii ayuu qisadii dib igu furay.

Markii aan guriga imid ayaa waxaan boorka ka jafay, buuggii aan bil ka hor armajada ku kor tuuray, wuxuna nasiib u yeeshay buuggan in dib loo kale furo bogagiisii ay ku xardhanayen qisadan xiisa badan, si loo dhameystiro.

Waana tan dhameystirka qisada:

“Iswiiti waa ay dhib badantahay, waa ayna qurux

badantahay, marka ay ku qososha, waxaa aad daremeysa farxad, timahana waa ay u daban yihiin, si qurux badana waa looguso labisay, waxa ay jeceshahay iney orodo, ciyaarto, laakiin marna waa sii dayna, marna waanu celina si aysan dharka isaga haleyn qoyaanka biyaha xeebta, si aan u noqono inago wada nadiif ah, waa fardowsa, maya ma ahan fardowsa ee waa gabadha yar ee ay dhashay xaaskeyga Caaliya, oo magaceedu yahay Fardowsa (sweety).”

Waxaan go’aansaday inaan ku laabto neyroobi, waxaan u soo anba-baxay kiinya. waxaan imid xafiiska shirkaddii uu maamulka ka ahaa, waxaan codsaday in la ila kulansiiyo mudane Xusen, markii aan cabbaar fadhiyo ayuu ii yimid wuxuna hadal igaga billaabay sida tan “waan ogaa inaad mar uun dib usoo laabaneyso, laakiin waxaan ogaaday inaad tahay wiil aan lacag lagu doorsan karrin, waana ku qaldana go’aan kii aan sannado ka hor qaatay, ee qalbigada dhaawaca u geystay. hadan markale ku iraahdo iska key cafi wiilkeygi miyaad iga aqbali?”, ereyadan waxaa ku dhawaaqayey aabbo u ooman farxada gabadhiisa, farxada qoyskiisa iyo reer ay ku qanacsantahay gabadhiisa.

Gacantiisa ayaan soo qabtay markasaan ku dhahay “soo ceeb ma ahan aabbe inuu wiilkiisa cafis

weydiisto, so ceyb iguma ahan in aabbe illintiisa qiimaha badan ay darteyda u qubato", waxaa uu igu yiri "maya wiilkeyga tani qaladkaga ma ahan ee waa aabbe qaldamay ciqaabtisa." Halkii ayaanu iska raacnay oo waxaan aadnay guriga, waxaan wada raacnay gaarigiisa isago telefon guriga u diray oo usheegay iney soo socoto marti weyn oo wax waliba lasii diyaar gareeyo.

Markii aan guriga tagnay, qoyska oo idil waa ay iwada eegayeen, sababto ah wax aqoona iima aysan lahayn, laga yaabbe iney sheekeyda hayeen, laakiin muuqeyga ma aysan garaneyn markii aanu fariisanay ayaa la yiri "Caaliya halo waco", markii ay qolka soo gashay, oo ay indhaha qac igu siisay ayeey indhaha qabsatay, sida ruux muddo qoraxda mooga oo indhihiisu u adkeysan kareyn falaaraha cad-ceedda. kolkaasey dhulka fariisatay oo ay oyday, waxa ay qaadan weyday sida aan dibugu so laabtay, halkii ayaan dib iskugu calmannay, iyada o heysata, gabar afar sano jir ah, oo la yiraahdo Axlam oo lagu naaneyso iswiitii (sweety), laakiin markii aan qisadan uga sheekeyay Caaliya ayeey iga ogolaatay inaan u bixino fardowsa si ay u noqoto xasuusteyda.

Caaliya iyado oo iga sheekeyneysa guurkii xuma ee

so maray ayeey tiri sida tan :

“Jacaylkii xad dhaafka ahaa waxaa jid gooyo u dhigtay aabbeheyga, isago oo is laha gabadhada nolol sare haku noolaato, laakiin waxaa uu ilowsana noloshu ineysan hanti iyo maal kaliya aheyn ee ay u baahantahay qalbiyo mid ah, oo dhib iyo dheef wada qeybsada.

Waxaan ugu goodiyay inaan nolosha ka doorbidi doono dimashada oo aan naftaba is dhaafin doono, waxaan maalmo ku xirna qol oo aan cuntadiiba ka soomay, markii danbe oo aan tacbaanay ayaa aabbe iisoo jilcay oo uu iga ogolaaday inaan jacaylkeyga nolol lawadaago.

Waxaa aan nimid Muqdisho, ma aanan aqoon halka aad daganeyd, lambarkadii waa aad iska badashay, baraha bulshada waa aad iska key xayirtay oo (waad i block tay), meel aan kala so xiriirno ayaanu garan weynay, waxaan ku shalaayay maxaad gurigiisa u baran weysay, markaad ereyada jacaylka isi dhaafsan jirteen.

Markii danbe ayaan dib ugu soo noqonay neyroobi, anigu kama quusan, laakiin aabbe waxaa uu isoo hor dhigay, far duca iyo mid habaar, waxaana ku qasbanaday inaan u raaco aabbe waxaa uu rabo,

halkiina ayaan ku guursaday ninkii uu aabbe ii dooray, laakiin aniga iyo farxadu waanu kala fogaanay, oo waxaan intan ku noola xusuusahaga.

Waxaan weheshan jiray dhambaaladada, ilaa markii danbe uu ninkii iqabay oo uu iga waayey wax farxada oo aan mudadii shanta sano ahayd oo aan wax caruura u dhalin ayaan halkiina ku kala tagnay in kasto aan ku duceysan jiray inaana wax uura qaadin ayaa markii aan kale tagi rabnay isku arkay uur oo aan ka qariyey xitaa inaan wax uur ah u qaaday laakiin gabadhan yar ayaa qorneyd inaan dhalo oo ayna wehel igaga noqotay cidlo kasto iso wajahday.”

Iswiiti waa ay dhib badantahay, waa ayna qurux badantahay, marka ay ku qososha, waxaa aad daremeysa farxad, timahana waa ay u daban yihiin, si qurux badana waa looguso labisay, waxa ay jeceshahay iney orodo, ciyaarto, laakiin marna waa sii dayna, marna waanu celina si aysan dharka isaga haleyn qoyaanka biyaha xeebta, si aan u noqono inago wada nadiif ah, waa fardowsa, maya ma ahan fardowsa ee waa gabadha yar ee ay dhashay xaaskeyga Caaliya, oo magaceedu yahay Fardowsa (sweety).

Wax waliba oo nolosheyda ah waa ay isbadaleen,

hada waxaan wada fadhinaa xeebta quruxda badan ee mombasa aniga iyo xaaskeyga Caaliya, wax waliba waxaa ay u muuqdan wax wanagsan, waa haddii laga saaro xasuusihii isoo maray, laakiin xaqiiqada ayaa ah inaan la tirtiri karrin xasuusaha.

Muddo sanado kaddib waxaa garab iyo farxad ii noqotay xaaskeyga Caaliya iyo iswiiti fardowsa, dalxiiskeena kaddib waxaanu u wada duuli doonna Abu dabey.

Dhammaad

Mahadcelin

Waxaan raba inaan dhoho mahadsanid, qof walba oo garab igu siiyay soo saarista sheekadan, waxaan ogahay dadka qaar oo hurdadooda ii seegay, oo habeenno badan ila soo jeeday, si ay iila farshaxaneyaan qisadan, oo aan ku howlana qoristeda muqdo ku dhadhaw labo sanno.

Kama wada gaaro inaan halkan kuwada xuso dhamaan magacyadooda, waxaan ku gaabinaya seddexda qof ugu horeysa oo kale ah

Bashiir awdiini, Suldaan neyruus iyo Sakariye maxamed cismaan.

Iyo dhamaan inta kale aan xusin magacyadooda, oo ayba la’aantod aan waxba is daba dhigi lahayn, ayaan waxaan markale leeyahay mahadsanidiin.